**Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
***Xafiiska Madaxweynaha***

**جمهورية الصومال الفيدرالية**
**مكتب الرئيس**

**Federal Republic of Somalia**
***Office of the President***

**SHARCI LR. 31** **TAARIIKH: 16/11/2020**

**ANSIXINTA SHARCIGA GOLAHA MIHNADLAYAASHA CAAFIMAADKA QARANKA**

**MADAXWEYNAHA J.F.S,**

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Faqradda 1aad iyo Faqradda 2aad ee Dastuurka KMG

**MARKUU ARKAY:** Qodobka 90aad, Xarafka "f" ee Dastuurks KMG

**MARKUU ARKAY:** Warqadda Gudoomiyaha Golaha Shacabka GSH/292, taariikh 06/07/2020 kuna saabsan ansixinta Sharciga **Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka**

**MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in la ansixiyo lana meel-mariyo Sharcigan

**Waxa uu Madaxweynuhu soo saaray Sharcigan:**

**Qodobka 1aad**

Laga billaabo marka uu Madaxweynuhu saxiixo Sharcigan, waxa si rasmi ah loo oggolaaday Sharciga **Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka**

**Qodobka 2aad**

Marka uu Madaxweynaha JFS saxiixo Sharcigan, waxa lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliyeed.

**MUQDISHO: 16/11/2020**

Madaxweynaha J. F.S
**Maxamed Cabdullaahi Maxamed "Farmaajo"**

Lr. GSH /7/20 Mogadishu, July 6, 2020

**Ku:** **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya**
**Og:** **R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya**
**Og:** **Guddoomiyaha Aqalka Sare**
**Og:** **Wasaaradda Caafimaadka**
**Og:** **Guddiga Arrimaha Bulshada**
**Og:** **Hanti-dhawrka Qaranka**
**Og:** **Garyaqaanka Guud**
**Og:** **Xoghayaha Guud ee Golaha shacabka**
**Og:** **Agaasimaha Waaxda Shuruucda ee Golaha Shacabka**

Ujeeddo: Ansixinta Sharciga Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka

M.ne Madaxweyne,

Si waafaqasan Qodobka 82aad Faqradiisa 3aad ee Dastuurka Federaalka Soomaaliya waxaan halkaan kuugu soo gudbinayaa Sharciga Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka ee ay ansixiyeen Labada Aqal ee BFS. Sharcigaan wuxuu si dhamaystiran u soo maray dhammaan habaraacyada uu farayo Dastuurka Federaalka Soomaaliya iyo Xeer-hoosaayada Labada Aqal ee BFS.

Ugu danbayn wuxuu Golaha Shacabka Kalfadhiga 7aad Kulankiisa 14aad ee 6da Luulyo 2020 ku ansixiyey sidatan soo socota:

**Oggol: 137** **Diiday: 5** **K aamustay: 1**

M.ne Madaxweyne, waxaan si waafaqasan Qodobka 90aad Xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaa codsanayaa in aad ku meelmariso xeer Madaxweyne, si loogu soosaaro Faafinta Rasmiga ah oo uu sharci u noqdo, si waafaqsan Qodobka 84aad iyo 85aad ee Dastuurka Federaalaka Soomaaliya.

Waxaad iga guddoontaa salaan qiimo badan.

**M.ne Maxamed Mursal Sheikh Cabdiraxaamn**
**Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

# Sharciga Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka

| Guddoomiyaha Golaha Shacabka- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Maxamed Mursal Shekh Cabdiraxmaan | Taariikh: July 6, 2020 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 1-aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne C/wali shekh Ibrahim Muudey | Taariikh: July 6, 2020 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 2-aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiixa: Mudane Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: July 6, 2020 |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Shacabka
Xafiiska Guddoomiye K/Xigeenka 1-aad

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشعب
مكتب النائب الأول لرئيس المجلس

Federal Republic of Somalia
House of the People
Office of the 1st Deputy Speaker

Ref: 184/5/1stDS/B-10/18 :الرقم Mogadishu November 29, 2018: التاريخ

Ku: Guddoomiyaha Aqalka Sare
Og: Madaxweyanaha Jmahuuriyada Federaalka Soomaaliya
Og: R.Wasaaraha Xukuumada Federaalka
Og: Wasaarada Caafimaadka Iyo Daryeelka Bulshada
Og: Guddiga Arrimaha Bulshada Ee Golaha Shacabka
Og: Garyqaanka Guud Ee Dawladda
Og: Hantidhawrka Qaranka
Og: Xoghayaha Guud Ee Golaha Shacabka
Og: Waaxda Shuruucda

UJEEDO: **SOO GUDBIN HINDISE-SHARCIYEEDKA GOLAHA MIHNADLAYAASHA CAAFIMAADKA QARANKA**

**Mudane Guddoomiye, Mudanayaal**

Sida aad la socotaan, Hindise-sharciyeedka Mihnadlayaasha Caafimaadka ee halkan ku lifaaqan waxa soo curiyay Wasaaradda Caafimaadka ee JFS, waxaan si waafaqasan Qodobka 80aad faqradiisa 1aad Dastuurka Federaalka Golaha Shacabka u soo gudbiyay Ra'iisal wasaaraha XFS. Waxaa golaha ka hor akhriday wasiiradda caafimaadka.

Kadib waxaa ka baaraandagey oo habraacii loogu talogalay marsiiyay Guddiga Arrimaha bulshada iyadoo xildhibaanada Golaha Shacabka ay kaga doodeen akhrinta labaad.

Ugu danbayn wuxuu Goluhu ku ansixiyay Hindise sharciyeedkan Kalfadhiga 4-aad fadhigiisa 25-aad taariikhdu markay ahayd 14/11/2018, codayntuna sidaan ayay u dhacaday:

**Oggol: 158; Diiday: 0 Ka aamustay: 0**

Sidaas darted, Mudane Guddoomiye waxaa halkaan ku lifaaqan nuqulka Hindise-Sharciyeedka uu Golaha Shacabku ansixiyay, iyo dokumentiga sharaxaya heerarkii kala duwanaa iyo wax kabadalladii lagu sameeyay Hindise shsraciyeedkaan, si aad [illegible] Waajibkiina dastuuriga ah.. Naga Guddooma Salaan Diirran iyo Qadarin

**M.ne Cabdiweli Ibraahim Sh. Mudeey**
**Guddoomiye K/X/1aad ee Golaha Shacabka,**
**Ahna K/simaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka**

SOO GUDBIN HINDISE-SHARCIYEEDKA GOLAHA MIHNADLAYAASHA CAAFIMAADKA QARANKA 2018

| Ku simaha Guddoomiyaha Golaha Shacabka ahna Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| Tirada Xubnaha Codeysay 158: Oggol (153)- Diidmo (0)- ka aamustay (0) | |
| Saxiix: M.ne Cabdiwali Ibraahim Sheekh Mudey | Taariikh: November 14, 2018 |

| Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad | Taariikh: November 14, 2018 |

| Xoghayah Guud ee Golaha Shacabka Baarlamaanka JFS | |
|---|---|
| | |
| Saxiix: M.ne Cabdikariin Xaaji Cabdi Buux | Taariikh: November 14, 2018 |

Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Golaha Aqalka Sare ee BFS
Xafiiska Guddoomiyaha

جمهورية الصومال الفيدرالية
مجلس الشيوخ
مكتب الرئيس

Federal Republic of Somalia
The Upper House
Office of The Speaker

Tix: XG/365/B-10/19 Taariikh: 26/11/2019 :التاريخ

Ku:- Guddoomiyaha Golaha Shacabka BFS =Muqdisho=
Og:- Xoghayaha Guud ee Golaha Aqalka Sare BFS =Muqdisho=
Og:- Xafiiska Garyaqaanka Guud ee Dowladda =Muqdisho=
Og:- Guddiga Arrimaha Bulshada ee Aqalka Sare BFS =Muqdisho=
Og:- Ra'iisul Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=
Og:- Madaxweynaha Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya =Muqdisho=

**Ujeeddo:**

**Soo Gudbin Qaraar Gole (Ansixinta Sharciga Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka)**

Mudane Guddoomiye,

Salaan diirran ka dib, waxaan kuu soo gudbinayaa Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya ee tirsigiisu yahay **Tix: GAS/B-10/KF6/04/2019** kuna taariikheysan **23$^{ka}$ Nofembar 2019** kuna ansixiyay Goluhu **Sharciga Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka:**

- Waxaa codeeyay: **29 Senatar.**
- Waxaa oggolaaday: **29 Senatar.**
- Waxaa diiday: **0 Senatar.**
- Waxaa ka aamusay: **0 Senatar.**

Sidaas darteed, Mudane Guddoomiye, waxaa halkan ku lifaaqan Qaraarka Golaha Aqalka Sare ee kor ku xusan iyo nuqulka sharciga uu Goluhu soo ansixiyay si aad uga gudataan waajibka dastuuriga ee la idiin igmaday.

Iga guddoon qadarin.

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

# ANSIXINTA SHARCIGA DHISMAHA GOLAHA MIHNADLEYAASHA CAAFIMAADKA QARANKA

| Senatarrada Codeeyay | Oggolaaday | Diiday | Ka Aamusay |
|---|---|---|---|
| 29 | 29 | 0 | 0 |

| Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi | **Taariikh:** 23ka Nofembar 2019 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Kowaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Abshir Maxamed Axmed | **Taariikh:** 23ka Nofembar 2019 |

| Guddoomiye Ku Xigeenka Labaad ee Golaha Aqalka Sare<br>Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya | |
|---|---|
| Sen. Mowliid Xuseen Guhaad | **Taariikh:** 23ka Nofembar 2019 |

**JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA**

# GOLAHA AQALKA SARE
# BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

## QARAAR GOLE

## ANSIXINTA SHARCIGA DHISMAHA GOLAHA MIHNADLEYAASHA CAAFIMAADKA QARANKA

Muqdisho,

23ka Nofembar 2019

KM0, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 - Mobile: +252 615519350
Email: Speaker@Senate.gov.so - Fdarbaal1@gmail.com
www.senate.gov.so

**Tix**: GAS/B-10/KF6/04/2019

Kalfadhiga 6aad

Kulankiisa 14aad

**Taariikh**: 23 Nov. 2019

## GOLAHA AQALKA SARE EE BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA

**MARKUU AKHRIYAY:**

Sharciga Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka oo ay nuqulkiisii kowaad soo curisay Xukuumadda Federaalka Soomaaliya uuna soo ansixiyay Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya una soo gudbiyay Golaha Aqalka Sare **12 Diseembar 2018**; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.82aad** iyo **Qod.83aad** ee Dastuurka KMG ah iyo **Qod.49aad** iyo **Qod.50aad** ee Xeer Hoosaadka Golaha Aqalka Sare.

**MARKUU ARKAY:**

**Qod.61aad (1) (3)** ee Dastuurka Ku Meel Gaar-ka ah.

**MARKUU TIXGELIYAY:**

Soo jeedinta in wax-ka-beddelka Sharciga Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka loo ansixiyo sida uu u soo diyaariyay Guddiga Arrimaha Bulshada ee Aqalka Sare.

**MARKUU GAROWSADAY:**

In danta guud ee Dalku ku jirto in la meel mariyo Sharciga Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafim-aadka Qaranka

**ISAGA OO KU KULANSAN:**

Kalfadhiisa 6aad, kulankiisa 14aad, oo ay soo xaadireen **30 Senatar** (Soddon Senatar).

**WUXUU GUDDOONSADAY QODOBADA HOOS KU XUSAN:**

**Qod.1[aad]**

Golaha Aqalka Sare wuxuu cod wada oggol ah ku ansixiyay **Sharciga Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka** isaga oo wax ka baddal lagu sammeeyay.

**Qod.2[aad]**

Qaraarka Golaha Aqalka Sare waxaa loo gudbinayaa Golaha Shacabka ee Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya; si uu uga guto waajibka dastuuriga ah ee loo igmaday.

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
GOLAHA AQALKA SARE

**Sen. Cabdi Xaashi Cabdullaahi**
**Guddoomiyaha Golaha Aqalka Sare**
**Baarlamaanka Federaalka Soomaaliya**

KM0, Degmada Shibis, Benaadir- Muqdisho- Soomaaliya
Landline: +252 6143620 - Mobile: +252 615519350
Email: Speaker@Senate.gov.so - Fdarbaal1@gmail.com
www.senate.gov.so

JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA

# SHARCIGA DHISMAHA GOLAHA MIHNADLEYAASHA CAAFIMAADKA QARANKA

**Sharci Lr. ________ ee ___________________**
**Sharciga Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka**

## QODOBKA 1aad
### Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ)

1. Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ) waa gole madax bannaan oo leh sifo-qaanuuneed marka uu gudanayo xilalkiisa iyo waajibaadkiisa la xiriira howlaha loo igmaday.
2. **Ujeeddooyinka Golaha:**
   b) Ka ilaalinta bulshada waxyeellada ka soo gaari karta xadgudubyada ka dhasha howl-gallada caafimaadka.
   t) Horumarinta anshaxa iyo xushmadda u dhexeysa heerarka mihnadleyaasha caafimaadka ee Soomaaliya.
   j) Diiwaan-gelinta iyo ruqsad-siinta mihnadlayaasha caafimaad iyo xeer-nidaaminta hab-dhaqankooda mihnadeed.
   x) Siinta ruqsado xarumaha adeegyada caafimaadka ee buuxiyay shuruudaha looga baahan yahay.
   kh) Aqoonsi-siinta xarumaha waxbarashada caafimaadka ee soo saara kaadirka (mihnadleyda) caafimaad.
   d) Meel-marinta ama joojinta manaahijta iyo barnaamijyada tababarada caafimaadka ee kala duwan.
   r) Xaqiijinta bad-qabka iyo tayada adeegyada caafimaad ee la siiyo bulshada Soomaaliyeed.
   s) Ka jawaabidda baahida loo qabo in mihnadleyaasha caafimaadka ee kala duwan loo sameeyo xeer u gaar ah, kaas oo lagu dhisayo gole guud oo ay ku jiraan dhammaan ururada mihnadleyda caafimaad sida Guddiga dhakhaatirta caafimadka guud iyo ilkaha, umulisooyinka, kalkaaliyeyaasha, daawo-yaqaannada iyo mihnadaha kale ee caafimaadka la xiriira.

## Qodobka 2aad
## Erey Bixin

**Golaha:** waxaa loola jeedaa Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ).

**Xeer-nidaamin**: waxaa loola jeedaa nidaamka mihnadeed ee wax-qabadka ama hab-socodyada kaas oo ku yimaada xeerar iyo hab-raacyo uu soo saaray Goluhu.

**Ansixin**: waxaa loola jeedaa xaqiijinta taaba-galnimo, awoodda, ama waxtarnimada machad tababarid caafimaad ama rug caafimaad oo la meel-mariyey iyo barnaamij howleedkooda.

**Karti Mihnadeed**: waxaa loola jeedaa awoodda hawl-wadeen caafimaad uu ku abuuri karo tayo mihnad aqooneed, mihnad, iyo mabaadi' ee khuseeya mihnad ku aadan hawl gaar ah ee dhammaan hawl-gallada caafimaadka iyo waxbarashadiisa.

**Xarumaha Waxbarasho Caafimaad:** waxaa loola jeedaa Jaamacadaha, Machadyada, Kulliyadaha, Dugsiyada iyo Xarumaha ku hawlan tababaridda qeybo gaar ah ee la xiriira hawlaha caafimaad ama qeyb kasta oo ku lug leh daawada.

**Mihnad**: waxaa loola jeedaa gacan-ku-hayn shaqo xilli dheer ee barasho gaar ahaaneed iyo shahaado aqoon toos ah oo lagu qaatay muddo waqtiyeysan

**Mihnadle Caafimaad**: waxaa loola jeedaa qof leh shahaado aqooneed oo uu ka qaatay xarun waxbarasho caafimaad ee la aqoonsan yahay oo diiwaan-gashan lehna ruqsad uu ku qabto mihnad qeexan ee dhanka daryeelka caafimaadka oo ka tirsan qeybaha caafimaadka.

**Shahaado Caafimaad**: waxaa loola jeedaa marag-kac rasmi ah iyo dhab ahaansho leh oo caddeynaya in mihnadle caafimaad si guul ah u dhammeystay barnaamij waxbarasho uu ku qaatay xarun waxbarasho caafimaad oo la aqoonsan yahay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

**Mihnadle Caafimaad ee Shisheeye**: waxaa loola jeedaa qof shisheeye ah ee shahaadooyinka aqooneed ee qof aan Soomaali ahayn ka qaatay xarun waxbarasho caafimaad ee la aqoonsan yahay.

**Shahaado Mihnad Caafimaad ee Shisheeye**: waxaa loola jeedaa shahaadooyin aqooneed oo ay bixisay xarun waxbarasho caafimaad shisheeye oo la aqoonsan yahay.

**Anshax-xumo Mihnadle Caafimaad**: waxaa loola jeedaa fal sharci-darro, anshax-xumo, ama meel-uga-dhac heerarka mihnadda caafimaad oo lid ku ah hab-raacyada xuquuqda adeegyada caafimaad.

**Xil-gudasho xumo hawl caafimaad**: waxaa loola jeedaa jebin xil daryeel caafimaad ee mihnadlaha ka saaran bukaanka, taas oo ay ka dhalato waxyeello soo gaarta bukaanka.

**Anshaxa Mihnadda Caafimaad**: waxaa loola jeedaa mabaadi'da dhawrta ama saameysa anshaxa mihnadlaha caafimaad ee adeeg-siinta bukaanka.

**Isku-filnaansho:** waxaa loola jeedaa bukaanka dhimmir ahaan fayo-qabka ah oo leh karti xusuus iyo qiimeyn warbixin la siiyey inta lagu guda jiro baarista iyo daaweynta; si uu u qaato go'aan maan-gal ah iyo lahaansho isku-filnaansho, go'aan-qaadasho iyo in loo tixgeliyo in uu yahay qof leh shuruudaha sharcigu tilmaamay.

**Isku-filane**: waxaa loola jeedaa in bukaanku leeyahay awood go'aan-qaadasho.

**Oggolaansho Xor ah**: waxaa loola jeedaa oggolaansho xor ah oo aan la isku khasbin oo uu bixiyey bukaan isku-filan oo la siiyey macluumaad buuxa oo ku aadan hab-raaca daawada ee isaga khuseeya.

**Oggolaansho Wakiil**: waxaa loola jeedaa oggolaansho laga helay qof ka wakiil ah qof aan isku-filnayn ha ahaado waayeel, carruur ama qof aanay u suurtogaleynin in uu oggolaansho bixiyo.

**Kala-soocitaanka Mihnadeed**: waxaa loola jeedaa kala-caddeynta iyo xaqiijinta shahaadooyinka aqooneed, waayo-arragnimo, iyo waxyaabaha la xiriira si loo hubiyo in ugu yaraan heerarka looga



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

baahan yahay qeybta caafimaad ee khusaysa hawl-galkan loo fuliyey si hab-sami leh.

**Qiimeyn Mihnadeed**: waxaa loola jeedaa hab-raaca uu dejiyey Goluhu si uu u go'aamiyo awoodda xil-gudasho iyo mihnad oo ay wehliso heerka aqoonta iyo mihnadda ee codsadaha.

**Xarumaha Adeegga Caafimaadka**: waxaa loola jeedaa xarumaha guud iyo kuwa gaarka ah ee laga bixiyo adeegyada caafimaad ee baarista, daaweynta, ka-hortagga, baxnaaninta ama laga qeybiyo walxaha daawada, qalabka kaabayaasha iyo aaladaha.

**Xarumaha Adeegyo Caafimaad ee Guud**: waxaa loola jeedaa xarun shaqaynaysa ee u furan dadweynaha xilli kasta, taas oo bixisa daryeel caafimaad ee ku habboon heerka loogu talo-galay xaruntaas.

**Diiwaan-gelin**: waxaa loola jeedaa hab-socodka diiwaan-gelineed ee mihnadle caafimaad oo soo dhammeystiray shuruudihii uu uga baahnaa Goluhu; si uu u bixiyo adeegyo gaar ah oo si rasmi ah looga diiwaan-geliyo diiwaanka uu gacanta ku hayo Golaha.

**Dib-u-diiwaan-gelin**: waxaa loola jeeda dib u diiwaan gelinta shahaadooyin dheeraad ah oo Goluhu aqoonsan yahay ee uu la yimaado mihnadle caafimaad oo hore u diiwaan gashanaa.

**Cusboonaysiin Diiwaangelin**: waxaa loola jeedaa cusboonaysiinta macluumaadka mihnadle caafimaad iyo ku-howlanaanshihiisa in uu sii wato howl-galkiisa, tababarka iyo barnaamijyada waxbarasho ka dib marka ay dhammaato muddada diiwaan-gelinta.

**Ruqsad**: waxaa loola jeedaa oggolaanshaha uu bixiyey Golaha, una oggolaanaya ruqsadlaha in uu uga howl-galo si sharci ah qeyb gaar ah oo ka mid ah mihnaha caafimaad oo isaga/iyada ruqsadda loo siiyey.

**Dib-u-ruqsad-siin**: waxaa loola jeedaa cusboonaysiinta ruqsada howl-gal ka dib marka ay dhacdo.

**Bah-wadaag Caafimaad**: waxaa loola jeedaa mihnadaha daryeelka caafimaad ee ka baxsan daawada.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## QODOBKA 3aad

### Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka

1. Waxaa la dhisay Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka wuxuuna ka kooban yahay **15** (Shan iyo toban) xubnood kuwaas oo ugu yaraan **30%** ay noqonayaan haween. Xubnaha waxay ka imaanayaan hay'adaha soo socdo:
   - b) 2 xubin Wasaaradda Caafimaadka
   - t) 1 xubin Wasaaradda Tacliinta Sare
   - j) 1 xubin Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Garsoorka
   - x) 3 xubin Ururka Dhaqaatiirta Soomaaliyeed
   - kh) 1 xubin Ururka Kalkaaliyeyaasha Soomaaliyeed
   - d) 1 xubin Ururka Umulisooyinka Soomaaliyeed
   - r) 1 xubin Xarumaha Waxbarashada Caafimaadka
   - s) 1 xubin Ururka Farsamo-yaqaannada Sheybaarka Soomaaliyeed
   - sh) 1 xubin Ururka Daawo-yaqaannada Soomaaliyeed
   - c) 1 xubin Ururka Fayo-dhawrka Soomaaliyeed
   - g) 1 xubin Adeegyada Caafimaad ee Gaarka loo leeyahay
   - f) 1 xubin Bulshada Rayidka Soomaaliyeed

2. Guddoomiyaha iyo Guddoomiye Ku-xigeenka waxaa iska dhex dooranaya Xubnaha Golaha.
3. Haddii uu bannaanaado xil (jago) xubinnimo ee Golaha, qofka buuxinaya waxaa lagu magacaabayaa muddo afar toddobaad gudahood ah wuxuuna dhammeystirayaa inta ka harsan muddo-xileedka xubinta uu beddelay.
4. Waxaa waajib ah in wargelin qoraal ah mudo soddon (30) maalmood ku siman loogu soo gudbiyo Guddoomiyaha ka hor inta xubin Golaha ka mid ah aysan is casilin.
5. Anshax iyo akhlaaq xumida ay 2/3 ee Goluhu u arkaan in ay waxyeello ama culeys ku yahay magaca, sharafta iyo jiritaanka Golaha, qofka xubinta ah ee ku lug leh arrimahaas waa laga saarayaa Golaha, waana la bedelayaa.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ

6. Goluhu wuxuu yeelanayaa astaan iyo shaabbad u gaar ah oo lagu isticmaalo ujeeddooyinka sharcigan uu jideeyay.
7. Goluhu wuxuu u qoondeynayaa xubnaha Golaha gunno maalmeed oo ay ku jiraan gunno xil-gudasho, gunno safar ama ka qeybgal shir.
8. Muddada xilhaynta xafiiska ee xubnaha Golaha waa saddex sannadood, oo la cusboonaysiin karo hal mar oo kaliya.
9. Dhammaadka muddada xilhaynta, xubintu way sii haynaysaa xilka xafiiska inta xubin kale laga soo magacaabayo.
10. Xubnaha Goluhu waxay wadanayaan howlahooda gaarka ah ee ka baxsan shaqada Golaha marka laga reebo waqtiga ay xubnuhu ku gudo jiraan xil-gudashada Golaha.
11. Looma oggola in xubini ay isla waqti qabato wax ka badan hal xil (mas'uuliyad).

## QODOBKA 4aad

## Magacaabidda Xubnaha Golaha

1. Hay'adaha, ha ahaadaan hay'adaha dowladda ama kuwa gaarka ah, waxay soo magacaabanayaan musharraxiinta uga mid noqonaya Golaha iyada oo go'aanka ansixinta ugu dambaysa uu gaarayo guddi ay Wasaaradda Caafimaadku u magacowdo iyadoo la tashanaysa Wasaaradaha Caafimaadka ee Dowlad Goboleedyada in ay hubiyaan shuruudaha xubinnimada isla markaasna ku soo dhammeystiraan xubnaha Golaha muddo aan ka badneyn seddex bilood. Marka xubinnimada buuxda la oggolaado, xubintu waxay u howlgaleysaa si madax-bannaan iyada oo wakiil ka ah danaha iyo ujeeddooyinka Golaha.
2. Marka ay buuxiyaan shuruudaha guud, xubnaha Golaha waxaa lagu xulayaa shuruudahaan:

   b) Caddeymo sugaya aqoonta mihnadda caafimaadka;

   **t**) Aqoon mihnadeed sare iyo karti dheeraad ah;

   **j**) Waayo-aragnimada mihnadda;

   **x**) Naxariis iyo daacadnidmo sare;

   **kh**) U hoggaansanta anshaxa iyo akhlaaqda mihnadda;

   **d**) Dhaqan iyo akhlaaq wanaagsan.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## QODOBKA 5aad
## Shuruudaha Guud ee Xubinnimada Golaha

Shuruudaha guud ee looga baahan yahay qofka xubin buuxda ka noqonaya GMCQ waa in uu yahay:

1. In uu yahay muwaadin Soomaali ah, deggan Soomaliya.
2. In uu leeyahay dhaqan suuban, xushmad sare-na ku dhex leh Bulshada Soomaaliyeed, iyo aragti sare oo xambaarsan daacadnimo.
3. In uu leeyahay ugu yaraan shahaadooyinka aqooneed ee looga baahan yahay mihnadlayaasha caafimaad. Sida oo kale, Mihnadlayaasha ka baxsan caafimaadka waa in ay leeyihiin shahaadooyin meel-mar ah ee qeybaha muhiimka u ah bulshada ee maaddooyinka la xiriira caafimaadka.
4. In uusan u oollin fal-dembiyeed ay si kama dambays ah maxkamadi ugu xukuntay ama uusan ahayn eedeysane sugaya maxkamad Dalka gudihiisa ama dibaddiisaba.
5. In uusan si muuqata ugu jirin howlaha khuseeya ganacsi iyo howl kasta oo saameyn ku yeelan karta ama ay is-diidayaan danaha Golaha;
6. In si xor ah uu u oggolaado xubinnimada mushaar la'aanta ah ee uu kaga mid noqonayo xubnaha Golaha.

## QODOBKA 6aad
## Heerarka iyo Xuquuqda Xubinnimada

1. Golaha Mihnadlayaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ) wuxuu leeyahay xubinnimo seddex heer ah iyada oo heer walba uu leeyahay kaalin iyo xuquuqo u gaar ah waxayna kala yihiin:
   b) Xubinnimada Rasmiga ah
   t) Xubinnimada Aragti-wadaagta
   j) Xubinnimada Xiriir wadaagta



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## Qodobka 7aad
## Xubnaha Rasmiga ah

1. Xubinnimada rasmiga ah ee Golaha waxay u furan tahay hay'adaha lagu cayimay **Qod.3aad** ee Xeerkan.
2. Xubnaha rasmiga ah ee Golaha waxay leeyihiin xuquuqda soo socota:
   b) Cod bixin marka Goluhu uu kulansan yahay;
   t) Soo jeedin qaraaro ku saleysan xeer hoosaadyada Golaha;
   j) Helitaanka warbixinta kasta oo lagama-maarmaan u ah in ay si buuxda uga qeyb qaataan howlaha Golaha.
   x) Helitaanka warbixin kasta ee uu hayo Goluhu, ha khusayso Golaha, xubin kasta, aragti-wadaag, ama xiriir-wadaag, ama cid kale, taas oo lagu siinayo xubnaha codsi iyo in Goluhu tixgelin ahaan la qumanaato.

## Qodobka 8aad
## Aragti-wadaag (Partners)

1. Goluhu wuxuu xubinnimo aragti-wadaag siinayaa ama u diidayaa ururada heer Qaran, kuwa ka dhexeeya dowlado badan ama ururo leh aragti caalami ah kuwaas oo aragti ama khibrad ku soo kordhin kara Golaha marka uu fulinayo howlaha la xiriira xeer nidaaminta caafimaadka oo ay ka mid yihiin caddeymaha shahaadooyinka, qiimeynta, imtixaan qaadidda iyo tayaynta waxbarashada ama wixii kale ee la xiriira tayada iyo hufnaanta wax-qabadka mihnadleyaasha caafimaadka.
2. Xubnaha aragti-wadaagta ah waxay leeyihiin xuquuqda soo socoto:

   b) Ka qeybgalka shirarka Golaha iyaga oo aan codeyneynin.

   t) U soo jeedinta GMCQ qaraaro iyada oo habraaca gudbinta qaraaradaas la waafajinayo xeer hoosaadyada uu soo saaro Golaha;

   j) Ka qeybqaadashada guddiyada joogtada ah oo dhan ama kooxo hawleedka Golaha marka laga reebo howlaha maamulka.
   j) Helitaanka warbixinta kasta oo lagama-maarmaan u ah in ay si buuxda uga qeyb qaataan howlaha Golaha.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

x) Helitaanka warbixin kasta ee uu hayo Goluhu, ha khusayso Golaha, xubin kasta, aragti-wadaag, ama xiriir-wadaag, ama cid kale, taas oo lagu siinayo codsi iyo in Goluhu tixgelin ahaan la qumanaato.

## Qodobka 9aad

## Xiriir - wadaag (Associates)

1. Golaha wuxuu xubinnimo xiriir-wadaag siinayaa ama u diidayaa urur kasta oo xiriir la leh Golaha kaas oo ka shaqeeya xeer nidaaminta mihnadaha daryeelka caafimaad.
2. Xiriir wadaagtu waxay leeyihiin xuquuqda soo socoto:

b) Ka qeybgalka guddiyada joogtada ah oo dhan ama kooxo howleedka Golaha marka laga reebo howlaha maamulka.

t) Ka-qeybgalka kulanka guud ee Golaha iyaga oo aan codeyneynin

j) Helitaanka warbixinta kasta oo lagama-maarmaan u ah in ay si buuxda uga qeyb qaataan howlaha Golaha.

x) Helitaanka warbixin kasta ee uu hayo Goluhu, ha khusayso Golaha, xubin kasta, aragti-wadaag, ama xiriir-wadaag, ama cid kale, taas oo lagu siinayo codsi iyo in Goluhu tixgelin ahaan la qumanaato.

## QODOBKA 10aad

## Awoodaha iyo Xilalka Golaha

Golaha wuxuu leeyahay awoodaha iyo xilalka soo socda:

1. Diiwaan gelinta iyo rukhsadsiinta xubnaha leh aqoonta mihnadaha caafimaad iyo xeer nidaaminta anshaxa mihnadeedka ee hawlwadeennada caafimaad.
2. Gacan ku haynta hannaanka habboon ee howlqabad oo ay wadaagaan howlwadeennada caafimaadka si waafaqsan mabda'a xeer-nidaaminta iyo dhiirri-gelinta caafimaadka Bulshada.
3. Horumarinta habboon ee heerarka kala duwan ee shaqaalaha caafimaadka
4. Dhiirigelinta jiritaanka iyo mansabka mihnadda caafimaadka iyo masuuliyadda lagu joojinayo adeegyada aan loo baahneyn ama laga maarmi karo gabi ahaanba ama qeyb ahaanba.
5. Ruqsadsiinta iyo aqoonsiga xarumaha caafimaad ee dadweynaha iyo kuwa gaarka loo leeyahay, sidoo kale hubinta tayada rugaha

caafimaad, adeegyada caafimaadka la bixiyo iyo xarumaha waxbarasho ee bixiya aqoonta caafimaadka.

6. Metelidda howlwadeennada caafimaad iyo ka shaqeynta danahooda.
7. Baarista eedeymaha iyo anshax xumida mihnadeed iyo saarista ciqaabaha ku habboon inta sharcigu uu jideeyay.
8. Ka hortagga iyo ka caawinta bulshada dhammaan howlaha la xiriira adeegga caafimaad ee aan hufneyn.
9. Talo siinta Wasaaradda Caafimadka, wasaaradaha kale ee ay khusayso, bahwadaagta caafimaadka iyo daneeyayaasha arrimaha la xiriira mihnadda caafimaadka.
10. Fulinta dhammaan waxyaalahaas iyo wax-qabadka howlaha loogu igmaday xeerkan iyo xeerarka kale ee Dalka.

## QODOBKA 11aad

### Waayista Xubinnimada Golaha

Qof kasta oo laga helo qodobada hoos ku xusan wuxuu luminayaa xubinnimada GMCQ:

1. Haddii uusan ahayn muwaadin Soomaali ah ama aanu haysan ruqsad uu uga howlgalo adeegga caafimaad;
2. Haddii magaciisa hore looga tiray diiwaanka Golaha.
3. Haddii lagu xukumay fal-dembiyeedyo ama gef asluubeed/ anshax xumo.
4. Haddii uusan dhimmir ahaan fayo qab ahayn.

## QODOBKA 12aad

### Dhammaadka Xubinnimada Golaha

Xubinnimada Golaha waxaa jiritaankeedu dhammaanayaa haddii la helo arrimaha soo socda:

1. Xubinta oo xilka laga qaado si waafaqsan Qodobka 3aad.
2. Xubinta oo geeriyoota; ama
3. Haddii xubin aysan ka soo qeyb gelin 3 jeer oo isku xigta kulamada Golaha iyada oo uusan jirin fasax sharci ah, caddeyn caafimaad, xaalado kale oo meel-mar ah oo ku yimid duruufo deg deg ah iyo xaalad ka baxsan awoodda aadanaha.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## QODOBKA 13aad

### Shaqaalaha Golaha

Shaqaalaha Golaha (Xubnaha Maamulka) waxay ka koobnaanayaan xubnaha soo socda:

1. Xoghayaha Guud ee Golaha; oo ah madaxa ugu sarreeya xagga maamulka
2. Ku-xigeenka Xoghayaha Guud ee Golaha;
3. Sarkaalka Diiwaan gelinta, Ruqsadda iyo aqoonsiga;
4. Sarkaalka tababarrada iyo kor u qaadista heerka aqoonta
5. Sarkaalka Hubinta Tayada;
6. Sarkaalka arrimaha sharciga iyo anshax mihnadeedka.
7. Khasnaji
8. Xisaabiye

## QODOBKA 14aad

### Awoodaha iyo Xilalka Xoghaynta Guud

Xoghaynta Guud waxay yeelanaysaa awoodaha iyo xilalka soo socda:

1. Gacansiinta guddi hoosaadyo uu abuuro Golaha, isku duwidda iyo kormeeridda howlahooda.
2. Xaqiijinta hirgelinta go'aanada la gudbiyey si waafaqsan xeernidaaminta
3. Fulinta go'aannada Golaha.
4. Metelaadda iyo qabashada xilalka Golaha xilliga uusan Goluhu kulansanayn; marka laga reebo awoodda in la laalo, wax laga beddelo, ama laga noqdo go'aannada Golaha.
5. Qabashada howl maalmeedka Golaha.
6. Hirgelinta wixii kale ee howlo ah ee uu u tilmaamo Goluhu.
7. Diyaarinta iyo gudbinta warbixinnada Golaha.

## QODOBKA 15aad

### Kulamada Xoghaynta Guud

**1.** Xoghaynta Guud waxay dejinaysaa xeer hoosaadyadeeda iyo habraaca kulamadeeda.

**2.** Kulamada Xoghaynta Guud waxaa isugu yeeraya xoghayaha guud hadba sida loogu baahdo.

3. Tirada looga baahan yahay kulamada waa goob joognimada in ka badan kala bar (50% +1) xubnaha maamulka.
4. Go'aan kasta oo lagu gaarayo kulamada maamul waa in lagu meelmariyo cod aqlabiyad ah, haddii ay codadku isla ekaadaan, waxaa la raacayaa dhanka uu u codeeyo Xoghayaha Guud.

## QODOBKA 16aad

### Kulamada iyo Go'aannada Golaha

1. Sida caadiga ah, Goluhu wuxuu kulamadiisa rasmiga ah qabsanayaa afar jeer sanadkiiba. Guddoomiyhu wuxuu isugu yeeri karaa kulamo dheeraad ah haddii ay noqoto lama huraan.
2. Kulamada Goluha waxaa shir guddoominaya Guddoomiyaha, balse haddii Guddoomiyuhu maqan yahay, waxaa shir guddoominaya Guddoomiye Ku-xigeenka, haddii labaduba maqan yihiin waxay iska dhex dooranyaan guddoomiye ku meel gaar ah.
3. Kulanka Golaha wuxuu ku guntamayaa goob joognimada boqolkiiba konton oo hal lagu daray ee tirada guud ee xubnaha Golaha.
4. Go'aanka kulanka Golaha wuxuu noqonayaa ra'yiga aqlabiyadda. Haddii ay dhacdo in codadku isla ekaadaan, qofka shir guddoominaya kulanka wuxuu lahaanayaa codka lagu kala baxayo.
5. Xogahayaha Guud waa in uu si rasmi ah u diiwaangaliyaa go'aannada Golaha.
6. Hadal qoraallada (minutes) kulanka waxaa la gaarsiinayaa ama loo qeybinayaa dhammaan xubnaha si ay taladooda uga soo dhiibtaan ka dibna ay u ansixiyaan.
7. Gunnooyinka iyo tas-hiilaadka kale ee ay ku helaan xubnuhu ka qeyb galka kulamada waxaa isla meel dhigaya xubnaha Golaha.
8. Habraacyada kale ee la xiriira kulanka Golaha waxaa go'aaminaya Golaha.
9. Qaadashada shaqaalaha maamulka iyo kuwa hoose si waafaqsan xeerarka shaqada Dowladda.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## QODOBKA 17aad
### Guddiyo Gaar Ah

1. Goluhu wuxuu abuurayaa seddex guddi oo gaar ah kuwaas oo lagu xulan doono aqoontooda, mihnadooda iyo waayo aragnimada ballaaran ee howshan ay u leeyihiin:
   b) **Guddiga Cilmi Baarista Caafimaadka:**
   Guddigani wuxuu darsayaa oo dib u eegayaa barotokoollada cilmi baarista khusaysa caafimaadka oo loo soo gudbiyo Golaha si ay u oggolaadaan.
   t) **Guddiga Anshaxa Mihnadleyaasha:**
   Guddigani waxay shaqadiisu tahay wax ka qabashada eedaymaha la xiriira anshax-xumada mihnadlayaasha iyo cabashooyinka kale ee xiriirka la leh ee la soo gaarsiiyo Golaha.
   j) **Guddiga Qiimeynta Mihnadlayaasha:**
   Guddi takhasus weyn leh oo loo xilsaaray in ay qaadaan imtixaan iyo habraacyada kale ee loogu talogalay in codsadayaashu maraan si ay u suurowdo in la kala sooco lana diiwaan galiyo.
2. Guddi kasta wuxuu iska dhex-dooranayaa guddoomiye iyada oo Wasaaradda Caafimaadka goobjoog ka tahay.
3. Guddiyadu waxay warbixin iyo talooyin siinayaan Guddoomiyaha, ka dibna, Golaha ayaa ka baaraan degaya talooyinkaas isagoo si habboon u waafajinaya siyaasadaha iyo qorshaha istiraatiijiyadeed ee u degsan.

## QODOBKA 18aad
### Cilmi-baarista Caafimaadka

Goluhu wuxuu qorsheynayaa isla markaana qeybinayaa:

1. Tilmaamo ku aaddan cilmi-baarista caafimaadka oo ku habboon howlwadeennada caafimaadka Soomaaliya;
2. Natiijada ka soo baxda cilmi baarista waxaa wadaagaya cilmi baareyaasha iyo shakhsiyaadka daneynaya iyaga oo ku helaya si lacag la'aan ah; iyo
3. Natiijada cilmi baarista waxaa lagu qeybin karaa ama lagu faafin karaa ansixinta Golaha.

**QODOBKA 19aad**

**Abuurista Maktabadda Asaasiga ah ee Golaha**

1. Goluhu wuxuu ka hirgelinayaa xarunta xafiiskiisa maktabad qalabeysan intii la awoodi karo, taas oo fududayn karta dib u eegista macluumaad iyo cilmi barista si loogu adeegsado tixraac ahaan, waana in ay bixisaa adeegyada soo socdo:
   **b)** Bixinta macluumaadka khuseeya xeer nidaaminta hay'adaha ku howlan mihnadaha caafimaad;
   **t)** Daraasadaha adkaynaya xushmadda loo hayo hannaanka xeer-nidaaminta caafimaad.
2. Goluhu wuxuu siinayaa waxbarasho iyo baraarujin dhammaan xubnihiisa iyo guud ahaan mihnadlayaasha caafimaad iyo inta kale ee daneyneysa kuna howlan sharciyada caafimaadka iyo saameynta ay ku leedahay caafimaadka iyo horumarka bulshadda.

**QODOBKA 20aad**

**Dhaqaalaha Golaha iyo Ilaha Laga Helayo**

Goluhu wuxuu uruurinayaa isla markaasna maamulayaa dhaqaalaha soo socdo:

1. Khidmadda diiwaan gelinta, ruqsad bixinta, iyo aqoonsi siinta mihnadlayaasha caafimaadka, goobaha adeega caafimaad, iyo xarumaha waxbarashada caafimaadka;
2. Dakhliga uu ka helo Goluhu ganaaxa ama ciqaabaha kale
3. Qoondo miisaaniyadeed oo ay Xukuumadda Soomaaliya siineyso Golaha;
4. Dhaqaalihii kale ee laga helo ilo kale.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

**QODOBKA 21aad**
**Isticmaalka Dhaqaalaha Golaha**

1. Goluhu wuxuu dhaqaalaha uu helo u adeegsanayaa ujeeddo ku aadan bixinta kharashyada uu galo ee la xiriira hirgelinta awoodihiisa iyo waajibaadkiisa, gudashada xilalkiisa iyo shaqooyinkiisa.
2. Goluhu waa in uu soo bandhigaa:
   **b**) Xisaabaad buuxa oo sax ah oo lagu keydiyo dhammaan dhaqaalaha uu Goluhu helay iyo kharashaadka uu galay.
   **t**) Warbixin sanadeedka dakhliga iyo kharashka oo loo diyaariyo si ku aaddan sanad miisaaniyadeed kasta iyo xisaab xir muujinaya xaaladiisa maaliyadeed ee dhammaadka sanad miisaaniyadeedkaas; iyo
4. Warbixin sanadeedka iyo xisaab xirka waa in uu ansixiyaa hantidhawre ay aqoonsan tahay Dowladda Federaalka Soomaaliya.
3. Guddomiyaha wuxuu warbixin maaliyadeed oo faahfaahsan seddexdii biloodba mar u gudbinayaa Wasaaradda Maaliyadda taas oo si cad u muujinaysa kharashka, haraaga, iyo sidoo kale qorshe howleedyo faahfaahsan ee lagu talo jiro in la hirgeliyo ka hor warbixin maaliyadeedka soo socota.

**QODOBKA 22aad**
**Xiriirka Iskaashi ee Golaha**

1. Goluhu wuxuu la yeelanayaa xiriir dhow oo ku dhisan is-fahan iyo wada shaqeyn Wasaaradda Caafimaadka (WC), wasaaradaha ay khuseyso, hay'daha kale ee dowladeed, Wasaaradaha Caafimaadka ee Dowlad Goboleedyada iyo hay'adaha kale ee daneeya adeegga caafimaadka, isaga oo wada shaqeyn dhow kala yeelanaya meelaha ay ka mid yihiin:
   **b**) Ka shaqeynta iyo is dhaafsiga iskaashi dhinacyada farsamada iyo horumarinta Mihnadlayaasha caafimaaadka;
   t) Iskaashi xagga horumarinta adeegyada iyo xarumaha caafimaad;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

j) Hirgelinta aqoon isweydaarsiyo iyo tababaro;
x) Is-dhaafsiga macluumaadka iyo isu gudbinta khibradaha sare;
kh) Isu gudbinta mihnadaha iyo kor u qaadida kartida.

## QODOBKA 23aad
### Khidmado

1. Goluhu wuxuu khidmado saarayaa diiwaan gelinta, ruqsad bixinta, iyo ansixinta arrimaha soo socdo:
   a) Machadyada tababarada caafimaad ee gaarka loo leeyahay
   b) Rugaha caafimaad ee gaarka loo leeyahay
   c) Mihnadlayaasha caafimaad ee muwaadiniinta ah iyo kuwa shisheeye oo loo sameynayo diiwaan gelin, ruqsadsiin iyo dib u ruqsadsiin
   d) Howl haynta mihnadleyda iyada khidmad laga qaadayo sannadkiiba mar
   e) Dib u eegid barotokoolada cilmi baarista caafimaad.
2. Goluhu wuxuu go'aamin karaa khidmado kala duwan ee heerarka kala duwan ee mihnadlayaasha caafimaad.

## QODOBKA 24aad
### Diiwaan-gelinta, Ruqsad-siin iyo Ansixinta

Diiwaan gelinta, rukhsadsiinta iyo ansixinta waxaa la sameynayaa iyada oo la tixgelinayo mabaadii'da soo socota:

1. Dhammaan xarumaha waxbarashada caafimaad ee Soomaaliya ee gaarka loo leeyahay waa in laga anxisiyaa xafiiska Golaha si loo hubiyo taabo galnimadooda.
2. Marka ardaygu uu soo qalinjebiyo waa in uu soo codsadaa diiwaangelin iyo ruqsadsiin. Diiwaangelinta waxay qeexeysaa/ caddeyneysaa nooca barnaamijka (meheradda), heerka adeegga ee loo oggolaan karo iyo shahaadooyinka uu haysto.
3. Sharci ahaan, waxaa ka reeban dhammaan mihnadlayaasha caafimaad ee shisheeye in ay u howl-galaan sidii howlwadeenno caafimaad, ka hor inta aan la diiwaan gelin ama ruqsad la siin.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

4. Rug kasta oo adeegyo caafimaad siisa bulshada waa in ay yihiin kuwo diiwaan gashan, ruqsad leh, loona oggolaaday fulinta adeegyo caafimaad.
5. Dhammaan macluumaadka muhiimka ah ee ku saabsan xarumaha waxbarashada caafimaad ee gaarka ah iyo goobaha caafimaad waa in uu soo gudbiyaa codsigooda mas'uul derejo sare leh oo meteli kara xarunta ama goobta caafimaad.

## QODOBKA 25aad

### Codsi Diiwaan-gelin

1. Qofka doonaya in loo diiwaan geliyo mihnadle caafimaad wuxuu ka codsanayaa Golaha isagoo soo buuxinaya warqadda codsiga isla markaana bixinaya khidmada looga baahan yahay ka hor inta uusan howlgelin.
2. Codsiga waa in ay la socdaan caddeynta shahaadooyinka codsadaha, fayo qabka jireed iyo midda dhimireed, sida oo kalena, warqadda dembi la'aanta.
3. Goluhu, soddon (30) cisho gudahood marka uu helo codsiga wuxuu si waafaqsan Faqradda (1) oggolaanayaa ama diidayaa codsiga.
4. Goluhu, haddii uu ku qanco mudnaanshaha codsadaha wuxuu sii wadayaa dhameystirka hab socodka diiwaan gelinta.
5. Goluhu, haddii uu diido codsi wuxuu si hab-sami ah u wargelinayaa codsadaha isagoo u sheegaya sababaha keenay diidmada.
6. Goluhu ma diiwaan gelinayo codsadeyaasha hore magacyadooda looga saaray diiwaan midkan la mid ah ee dal kale sababo la xiriira anshax-xumo xitaa haddii ay buuxiyaan dhammaan shuruudihii looga baahnaa.

## QODOBKA 26aad

### Shuruudaha Diiwaan-gelinta ee Mihnadlayaasha Caafimaad

1. Qofna looma oggola in loo diiwaan geliyo mihnadle caafimaad haddii qofkaasi uusan:
   **b**) Haysan shahaado asaasi ah oo uu bixiyey machad ama xarun waxbarasho uu Goluhu aqoonsanyahay.
   **t**) Ka gudbin kulan wareysiga iyo imtixaanka uu la yeelanayo Goluhu;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

**j**) U soo dhammeystirin dhammaan shuruudaha uu go'aamiyay Goluhu.

2. Goluhu, haddii codsadaha buuxiyo shuruudaha Xeerkani tilmaamayo, wuxuu u diiwaan gelinayaa codsadaha in uu yahay mihnadle caafimaad isagoo siinaya shahaado diiwaan gelin.

## QODOBKA 27aad

### Heerarka Diiwaan gelinta

Golaha wuxuu bixinayaa heerarka diiwaangelin ee hoos ku tilmaaman:

1. Diiwaan gelin ku meel gaar ah
2. Diiwaan-gelin buuxdo
3. Diiwaan gelin takhasusle

## QODOBKA 28aad

### Diiwaan gelin Ku meelgaar ah

1. Qof haysta shahaado ay bixisay xarun waxbarasho ee uu aqoonsan yahay Goluhu, wuxuu xaq u leeyahay diiwaan gelin ku meel gaar ah; taas uu ku howlgelayo muddo cayiman iyada oo lagu kormeerayo lana hubinayo wax qabadkiisa ka hor inta aan loo diiwangelinin si buuxda.
2. Goluhu, marka qof u soo gudbiyo codsigiisa si waafaqsan faqradda (1), wuxuu siinayaa shahaado diiwaan gelin oo ku-meelgaar ah haddii:
   **b**) Codsaduhu buuxiyo shuruudaha diiwaan gelinta ku meel gaarka ah;
   **t**) Goluhu go'aamiyo in tababarka uu hore u qaatay codsaduhu uu u dhigmo kan looga baahan yahay diiwaan gelinta ku meel gaarka ah.
3. Goluhu, haddii ay dhacdo in uu diido diiwaan gelinta ku meel gaarka ah, wuxuu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha isagoo u sheegaya sababaha lagu diiday codsigiisa.
4. Qofka haysta shahaado diiwaan gelin oo ku meel gaar ah wuxuu si ku meel gaar ah uga hawlgeli karaa howlaha adeegyada caafimaad ee Soomaaliya iyada oo la kormeerayo.
5. Qofka haysta diiwaan gelinta ku meel gaarka ah wuxuu ka howlgeli karaa oo keliya rug caafimaad ama xarun waxbarasho oo Goluhu aqoonsan yahay.
6. Goluhu waa in uusan qofna ku diiwaan gelin shahaado ku meel gaar ah muddo ka badan laba sano.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

## QODOBKA 29aad
### Diiwaan-gelin Buuxdo

1. Mihnadlaha caafimaadka wuxuu xaq u leeyahay diiwaan gelin buuxda ee mihnadda caafimaad ee ay shahaadooyinkiisu la xiriiraan haddii:
   **b**) Qofku haysto shahaado la aqoonsan yahay oo ah heer diblooma, derejada kowaad ee jaamacadeed ee la xiriirta qeyb gaar ah ee mihnad caafimaad ee ay bixisay xarun waxbarasho oo si sharci ah uga diiwaan gashan Soomaaliya, ama xarun waxbarasho shisheeye oo la aqoonsan yahay;
   **t**) Markii hore uu ku meel gaar ahaan u diiwan gashanaa soona dhammaystay muddadii diiwaan gelinta ku meel gaarka ahayd.
   **j)** Uu keeno caddeynta dukumiintiyada asalka ah ee la xiriira aqoontiisa.
2. Qofka si ku meel gaar ah u diiwaan gashan wuxuu gelayaa imtixaan iyada oo la qiimeynayo kartidiisa aqooneed iyo habsami u fulinta wax qabadka mihnadda caafimaad ka hor inta uusan u gudbin diiwaan gelinta buuxda.
3. Shahaadooyinka ku xusan faqradda (1) ka sokow, waa in qofku ka qanciyaa Golaha waayo aragnimada looga baahan yahay: adeegidda waqti buuxda oo ay wehliso khibrad muddo afar iyo labaatan bilood ee isbitaal uu aqoonsan yahay Goluhu.
4. Diiwaan gelinta buuxda waxay jiraysaa muddo seddex sanadood ah laga bilaabo taariikhda la bixiyay.

## QODOBKA 30aad
### Diiwaan gelin Takhasusle

1. Qofku wuxuu xaq u leeyahay diiwaan gelin takhasusle ee takhasus mihnad caafimaad oo la aqoonsan yahay haddii:
   **b**) Qofku haysto shahaadada derejada labaad ee jaamacadeed oo takhasus la aqoonsan yahay ah;
   **t**) Qofku uu mudan yahay una qalmo diiwaan gelinta takhasus la aqoonsan yahay ee mihnad caafimaad.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

2. Raadraaca mihnad caafimaad ee takhasuska waa in ay lahaato tixraac hore oo caddeynaya in takhasus mihnadlaha caafimaad ay xiriir toos ah la leedahay waxbarashadii hore.
3. Diiwaan gelinta guud ee mihnadda caafimaad ee takhasuska waa in ay noqoto mid leh tixraac diiwaan gelineed oo sugeysa in mihnadan ay tahay takhasus la aqoonsan yahay.
4. Muddada diiwaan gelinta mihnadle caafimaad ee la siiyay diiwaan gelin takhasus la aqoonsan yahay waa in aysan ka badneyn 24 bilood.

## QODOBKA 31aad
## Beddelaadda Macluumaad

1. Mihnadlaha diiwaan gashan waa in uu ku wargeliyaa xoghayaha guud wax kasta oo beddelaad ah oo ku dhaca macluumaadka gaarka ah ee qofkaas ee la xiriirta diiwaan gelinta, muddo toddoba maalmood gudahood ah.

## QODOBKA 32aad
## Kala Noqoshada Diiwaan-gelinta

1. Goluhu wuxuu kala noqonayaa diiwaan gelinta mihnadlaha caafimaad haddii:
   - b) Goluhu helo sababo meel mar ah ee uu ku rumeysan karo in diiwaan gelinta lagu helay hab musuq ah, been abuur ama qarinta xaqiiqada dhabta ah;
   - t) Mihnadlaha caafimaadka ay ku caddaato in uu galay xad-gudub anshax xumo mihnadeed ama howlo lid ku ah xurmad mihnadeedka iyo niyad wanaagga;
   - j) Mihnadlaha caafimaadka uu ka howl galo rug caafimaad oo uusan diiwaan gelin u haysan;
   - x) Muddada diiwaan gelinta ee mihnadlaha caafimaadka ay dhacdo;
   - kh) Mihnadlaha caafimaadka lagu helo xadgudub sharci kasta oo jira;
   - d) Xilligii diiwaan gelinta ay soo if-baxaan xaalado muujinaya in mihnadlaha uusan uqalmin in la diiwaan geliyo.
2. Goluhu wuxuu kala noqonayaa diiwaan gelinta buuxda haddii qofku:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

b) Uu waxyeello u leeyahay in uu ka howlgalo mihnadaha caafimaadka taas oo saameyn karta badqabka bulshada;
t) Uu leeyahay taariikh fal-dembiyeed oo gaarsiisan in uu saameyn xun ku yeesho shakhsiyaadka ka howlgala mihnadda;
j) Haddii Qaab howleedka, baaxadda, iyo muddada waxqabadkii hore ee mihnadda aysan ku filnayn in ay buuxiyaan shuruudaha asaasiga ah.

3. Goluhu wuxuu, ka hor inta uusan kala laaban diiwaan gelinta mihnadlaha caafimaad si waafaqsan Faqradda (1), siinayaa mihnadlaha fursad lagu dhegeysto.
4. Ka hor inta uusan baabi'in diiwaan gelinta mihnadlaha caafimaad, Goluhu wuxuu xayiraad saarayaa howlihiisa muddadaas iyada oo qodobada iyo shuruudaha Golaha la tixgelinayo
5. Haddii Goluhu baabi'yo diiwaan gelinta qof si waafaqsan Qodobkan, magaca qofka waa in laga saaraa Diiwaanka iyada oo aan dib loogu soo celin karin haddii aan la helin shuruudo u oggolaanaya in dib loo diiwaan geliyo kuwaas oo Goluhu ku qancay.

## QODOBKA 33aad
## Ka noqoshada Diiwaan-gelin Shahaado

1. Haddii Goluhu helo macluumaad in magaca qofka lagu diiwaan geliyey si musuq ah ama khalad ah oo la xaqiijiyey baaris ka dib in arrinkani uu yahay dhab, Goluhu waxa uu hakin karaa ku shaqeynteeda isla markaana dib uga noqon karaa diiwaan gelinta shahaadada qofkaas.

## QODOBKA 34aad
## Dib-u-diiwaan gelin

1. Mihnadlaha haysta shahaado hore loo diiwaan geliyay muddadii loogu talo galayna ay dhammaatay wuxuu ka soo codsan karaa Golaha shahaado dib u cusbooneysiin isaga oo raacaya hannaanka loo dejiyey isla markaana bixinaya khidmadda looga baahan yahay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

2. Goluhu wuxuu muddo shan iyo toban maalmood gudahood ah ka dib helitaanka codsiga si waafaqsan faqradda (1), oggolaanayaa ama diidayaa codsigaas.
3. Goluhu wuxuu, haddii ay dhacdo in uu diido codsiga si waafaqsan faqradda (2), ku wargelinayaa codsadaha si habsami leh asagoona u sheegaya sababaha diidmada.
4. Haddii lagala noqdo mihnadlaha caafimaad diiwaan gelinta ama la laalo, taas oo waafaqsan qodobada iyo shuruudaha uu Goluhu go'aamiyo, mihnadlaha caafimaad ee arrintaasi saameysay wuxuu codsan karaa dib u diiwaan gelin.
5. Sida ku cad qodobada xeerkan, Goluhu wuxuu siin karaa shahaado dib u diiwaan gelin:

b) Haystaha shahaado diiwaan gelin ku meel gaar ah, haddii haystuhu:

1 Uu ka howlgalo rug caafimaad oo uu oggolaaday Goluhu muddo aan ka yareyn afar iyo labaatan bilood.

2 Ka gudbo imtixaanka laga qaaday.

3 Uu leeyahay asluub wanaagsan iyo hab dhaqan mihnadeed oo habboon.

4 Uu buuxiyo shuruudaha kale ee looga baahan yahay.

t) Haystaha shahaado diiwaangelin buuxda, haddii uu buuxiyo:

1. Shuruudaha looga baahan yahay horumarinta joogtada ah ee mihnada Mihnadle caafimaad oo diiwaan gashan.
2. Shuruudaha ku aadan hab dhaqanka, baaxadda, iyo muddada uu shaqada soo hayay ee codsaduhu doonayo in loo diiwaan geliyo; iyo
3. Awoodda howlwadeen-ku u leeyahay in uu wax kula xiriiro Afka Soomaaliga.

## QODOBKA 35aad

## Nuqul Sameyn Shahaado Diiwaan gelin

1. Haddii qof ay shahaado u diiwaan gashan ay ka baaba'do ama ka lunto wuxuu ka soo codsan karaa Golaha in loo sameeyo nuqul cusub oo la xiriira diiwaan gelinta shahaadadiisa.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ

2. Helitaanka codsiga ka dib si waafaqsan farqadda 1[aad], xoghayaha guud wuxuu siinayaa codsadaha nuqul shahaado diiwaangelin.

## QODOBKA 36aad

## Shuruudaha Diiwaangelinta Mihnadleyaasha Caafimaadka ee Shisheeye

1. Mihnadladaha caafimaad ee shisheeye ee doonaya in uu is-diiwaan-geliyo waa in uu:
   b) Haystaa deganaansho sharci ah ee Soomaaliya;
   t) Haystaa shahaado jaamacadeed oo la aqoonsan yahay;
   j) Ka gudbaa imtixaanka loogu talogalay.
   x) Soo buuxiyaa shuruudaha kale ee ku cad foomka diiwaan gelinta
2. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye oo buuxiyay shuruudaha ku tilmaaman faqradda (1) waxaa kormeer iyo masuuliyad ku leh xarunta caafimaad ee uu shaqada u hayo.

## Qodobka 37aad

## Diiwaan gelin Ku Meel Gaar ah ee Minadleyaasha Shisheeye

1. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye wuxuu codsan karaa diiwaan gelin ku meel gaar ah.
2. Goluhu wuxuu siinayaa codsadaha shisheeye shahaado diiwaan gelin ku meel gaar ah ka dib helitaanka codsiga lagu soo gudbiyey si waafaqsan faqradda (1), haddii codsaduhu:
   b) Haysto deganaansho sharci ah ee Jamhuuriyadda Federalka Soomaaliya;
   t) Leeyahay aqoon iyo tababar ku filan;
   j) Ka gudbay kulan wareysiga iyo imtixaanka Goluhu ka qaaday;
   x) Soo gudbiyo shahaado asluub wanaag uu ka soo qaatay hay'ado mihnadeed oo laga aqoonsan yahay Dalka uu mihnadluhu ka diiwaan gashan yahay;
   kh) Soo gudbiyo caddeyn ku aadan in mihnadluhu leeyahay aqoon ku filan ee Afka Carabiga, Ingiriisiga ama luqad kale oo la turjumi karo.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ

d) Uga shaqaynayo Soomaaliya codsiga Xukuumadda ama xarun caafimaad oo oggolaasho u haysata keenista Mihnadlaha Shisheeye.

3. Mudada la siinayo mihnadlaha caafimaadka shisheeye shahaadada diiwaan gelinta ku meel gaarka ah waa muddo ku siman lix bilood.
4. Goluhu wuxuu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha shisheeye haddii ay dhacdo in uu diido codsiga diiwaan gelinta ku meel gaarka ah isagoo u sheegaya sababaha keenay diidmada.
5. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye oo haysta shahaado diiwaan gelin ku meel gaar ah waa loo cusbooneysiin karaa shahaadadiisa hadii uu:

   b) Dhammeysto lix bilood oo shaqo xiriir ah ee rug caafimaad oo leh darajada A ama derejada B.

   t) Soo-gudbiyo qoraal uu bixiyey kormeeraha qofkaas ee rugta caafimaad oo caddeynaya in qofku uu si habsami ah u gutay xilkiisa, isla markaana uu muujiyey mihnad iyo aqoon u dhiganta midda lagu tabobaro mihnadleyaasha caafimaad ee Soomaaliya.

## Qodobka 38aad
## Diiwaan gelin Xaddidan

1. Mihnadlaha caafimaad ee shisheeye wuxuu xaq u leeyahay in uu isku diiwaangeliyo diiwaan-gelin xaddidan haddii:

   b) Uu haysto deganaansho sharci ah ee Soomaaliya.

   t) Hore loogu soo diiwaan-geliyey si ku meel gaar ah.

   j) Uu ka gudbo imtixaanka laga qaaday.

   x) Ay soo gudbisay codsigiisa rug caafimaad oo la aqoonsan yahay.

2. Goluhu wuxuu ku diiwaan-gelinayaa mihnad-laha shisheeye darajo u dhiganta tii uu uga shaqaynayay dalka uu ka yimid, haddii:

   b) Uu haysto degenaansho sharci ah ee Soomaaliya;

   t) Uu leeyahay asluub wanaag mihnadeed ee Dalka uu ka yimid oo la xiriirta adeegga caafimaad, iyo

   j) Uu ka gudbay imtixaanka uu ka qaaday Goluhu.

3. Mihnadlaha shisheeye kuma haysan karo diiwaan gelinta xadidan wax ka badan hal takhasus.
4. Goluhu wuxuu qeexayaa qodobbada iyo shuruudaha looga baahan yahay diiwaan-gelinta xadidan si waafaqsan qodobkan, sida oo kale-na,



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

howlaha la qabanayo, ama dabeecadda kormeerka loo baahan yahay ee mihnadlaha caafimaad ee shisheeye.

5. Muddada la siinayo mihnadlaha caafimaadka shisheeye shahaadada diiwaan gelinta xadidan waa muddo ku siman labo iyo toban bilood.
6. Goluhu wuxuu u cusboonaysiinayaa diiwaan gelinta muddada xaddidan ee mihnadle caafimaad ee shisheeye si waafaqsan qodobbadan iyo shuruudo uu Goluhu go'aamiyey haddii xarunta caafimaadku ay soo codsato.

## QODOBKA 39aad
### Mamnuucidda Howl-galka
### Mihnadleyaasha aan Diiwaan-gashanayn

1. Cidna looma oggola in ay u howlgasho mihnadle caafimaad ahaan, haddii uusan qofkaasi u diiwaan-gashanayn howlgalkaas.
2. Qofka u qalma mihnadaas balse aan diiwaan gashanayn, oo ku xad gudba faqradda (1) wuxuu gelayaa xad gudub isagoo mutaysanaya, haddii lagu helo, ciqaab ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo kun oo Doollarka Mareykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma).
3. Qof aan u qalmin isla markaana ku xad-gudba faqrada 1aad wuxuu gelayaa xad-gudub uu ku mutaysanayo, haddii lagu helo, ciqaab ganaax lacageed oo aan ka badnayn afar kun oo doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma), wixii fal dembiyeed ah ee ka dhasha howlqabadka waxaa lala tiigsanayaa ciqaabaha uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## QODOBKA 40aad
### Xadgudubyada Ka Yimaada Mihnadle Caafimaad

Mihnadlaha caafimaad ee heysta shahaado uu Goluhu diiwaan geliyay, wuxuu gelayaa xadgudub haddii uu:

1. Beddelo ama tirtiro macluumaadka ku qoran shahaadada diiwaan gelinta ama nuqulka shahaado kale uu bixiyay Golaha.
2. Been abuuro ama adeegsado mansab howlwadeen caafimaad oo diiwaan gashan iyada oo aan lagu diiwaangelinin sida uu qabo xeerkan;



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

3. Howlgeliyo xarun waxbarasho caafimaad (**XWC**) ama xarun bixisa adeegyo caafimaad (**XAC**) oo Goluhu siinin oggolaansho;
4. Qariyo xaqiiqada dhabta ah ama lagu helo isku day metelaad iyo musuq ku saleysan;
5. Siiyo shahaado aqooneed ee mihnadda caafimaadka qof aan ku guulaysan imtixaannada mihnadeed ee looga baahnaa in ay bixiyaan xarumaha waxbarashada caafimaad ee la aqoonsan yahay;
6. Been abuuro shahaado diiwaan gelin ama shahaado kale oo uu bixiyey Goluhu;
7. Ku shaqeysto mihnad caafimaad oo aan loo haysan ruqsad shaqaynaysa oo uu bixiyay Golahu.
8. Fuliyo adeegyo daryeel caafimaad oo dhaafsan heerka loo xadiday mihnadlaha caafimaad ee diiwaan gashan.
9. Bixiyo adeeg caafimaad sida baarista, daweynta, qalliin oo waxyeelo u geysta bukaanka taas oo ku timaada dayacaad iyo xil gudasho xumi.
10. Faafiyo xog bukaanka iyada oo aysan jirin wax khasbaya.
11. Dayaco bukaanka ama uga faa'iideysto danahiisa gaar ahaaneed.
12. Xurmeyn waaya hab raaca daweynta, anshaxa iyo xushmadda xirfadda caafimaadka.
13. Qofkii gala xad-gudbyada ku cad faqraddaha kore, haddii lagu helo, waxaa la saarayaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn kun doolarka Maraykanka ah (ama shilin somaali u dhigma), iyo ciqaabta uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## QODOBKA 41aad

### Diiwaan gelinta Xarun Caafimaad

1. Codsiga diiwaan gelinta ee xarun caafimaad waa in loo soo gudbiyaa Golaha ka hor inta aysan rugaha caafimaad ka howl gelin adeegyada caafimaadka.
2. Goluhu wuxuu diiwaan gelinayaa xarumaha caafimaadka ee gaarka loo leeyahay.
3. Marka la dhameystiro diiwan gelinta xarunta ayaa loo aqoonsanayaa xarun si sharci ah u diiwaan-gashan.
4. Xoghayaha guud wuxuu diiwaan-gelinayaa goobaha laga bixiyo dawooyinka iyo xarumaha caafimaad ee yar yar.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

5. Diiwaan-gelinta rugaha caafimaad ee la dhammeystiray waxay jireysaa laba sano laga billaabo taariikhda diiwaan gelinta iyada oo la cusbooneysiinayo labadii sanaba mar.

## QODOBKA 42aad
### Codsi Ruqsada Howlqabad ee Mihnadle Caafimaad

1. Mihnadlaha caafimaadka waa in uu soo codsadaa ruqsad howlqabad si waafaqsan hannaanka degsan ee la xiriira daweynta guud, ilkaha, kalkaaliyenimada, umulisonimada, ama mihnad kale ee gaar ahaaneed.
2. Mihnadlaha caafimaad ma codsan karo ruqsad howl qabad isaga oo aan marka hore is diiwaan gelin.
3. Nuqulka asalka ah ee shahaadada diiwaan gelinta waa in uu la socdaa codsiga ruqsadda.
4. Xoghayaha Guud waa in uu hubiyaa in codsadaha ruqsadda soo dhammeystiray shuruudaha looga baahan yahay oo ay ka mid yihiin shahaadooyinka, imtixaanka, khibradda looga baahan yahay, iyo wareysiyada uu la yeelanayo Golaha.
5. Goluhu haddii uu ku qanco in codsaduhu soo buuxiyay shuruudaha ku xusan faqradda (4) wuxuu si rasmi ah u oggolaanayaa in la siiyo codsadaha ruqsad howlqabad.
6. Mihnadlaha caafimaad wuxuu sanadka kowaad ee shaqadiisa lagu ruqsadsiinayaa hal sano oo tijaabo ah si loo hubiyo kartida iyo waxtarka shaqadiisa.
7. Haddii Goluhu diido codsiga ruqsad siinta, xoghayaha guud wuxuu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha go'aanka Golaha isaga oo u sheegaya sababaha diidmada.
8. Ruqsadda howlqabad ee lagu bixiyey sida ku tilmaaman Faqradda (5) waxay jiraysaa labo sano laga bilaabo taariikhda la bixiyey iyada oo la cusbooneysiinayo labadii sanaba mar.

## QODOBKA 43aad
### Mamnuucidda Howlqabadka
### Mihnadlaha Aan Ruqsadda Heysan

1. Qofna uma howlgeli karo sidii mihnadle caafimaad isaga oo aan haysan ruqsad uu bixiyey Goluhu.
2. Qofka ku xadgudba Faqradda (1) wuxuu gelayaa xad gudub isaga oo mutaysanaya ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma), wixii ciqaab ah ee ka dhasha howlqabadkiisa waxaa lagu ciqaabayaa ciqaabta uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## QODOBKA 44aad
### Cusboonaysiin Ruqsad Howl-qabad

1. Mihnadlaha caafimaad ee ay dhacdo ruqsaddiisa howl-qabad waa inuu Golaha u soo gudbiyaa codsi cusbooneysiin ee ruqsadda howl qabadka.
2. Mihnadlaha caafimaadka marka uu soo gudbinayo codsiga cusbooneysiinta ruqsadda waa in:
   b) Uu buuxiyo foomka cusbooneysiinta ruqsada.
   t) Uu la yimaado caddeyn kartidiisa mihnadeed iyo asluub wanaag ay sugtay xarun caafimaad oo leh ruqsad.
   j) Uu la yimaado shahaadooyinka ama caddeymaha horumarinta joogtada ah ee aqoontiisa mihnadeed.
   x) Uu maraa baaritaanka caafimaad.
   kh) Uu galo imtixaanka, wareysiga, iyo qiimeynta uu Goluhu ka qaado.
3. Xoghayaha Guud waa inuu hubiyaa in codsadaha cusbooneysiinta ruqsadda soo dhammeystiray shuruudaha ku xusan Faqradda (2).
4. Goluhu haddii uu ku qanco in codsaduhu soo buuxiyay shuruudaha cusbooneysiinta ruqsadda ee ku xusan Faqradda (2) wuxuu si rasmi ah u oggolaanayaa in loo cusbooneysiiyo codsadaha ruqsad howlqabad.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

5. Haddii Goluhu diido codsiga cusbooneysiinta ruqsad howl-qabad, xoghayaha guud wuxuu si habsami leh ugu wargelinayaa codsadaha go'aanka Golaha isaga oo u sheegaya sababaha diidmada.
6. Mihnadlaha da'diisu ka weyn tahay lixdan iyo shan (**65**) sano wuxuu marayaa baaritaanka badqabka caafimaad oo lagu hubinayo fayo qabka aragga, maqalka, iyo maskaxda mihnadlaha soo codsaday cusbooneysiinta ruqsadda.
7. Ruqsadda la bixiyay oo aan la cusboonaysiin sida ku tilmaaman Faqradda (1) waa waxba kama jiraan.
8. Mihnadle caafimaad ee sii wata howl-qabadkiisa ka dib marka ruqsadiisa laga dhigo wax kama jiraan wuxuu gelayaa xad gudub uu ku mutaysanayo, haddii lagu helo, ganaax lacageed oo aan ka badnayn toddobo boqol oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma), wixii xadgub ah ee ka dhasha howlqabadka mihnadlaha waxaa lala tiigsanayaa Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

### QODOBKA 45aad
### Muujin Ruqsadeed

1. Mihnadlaha la siiyay ruqsad adeeg gaar ahaaneed ee caafimaad wuxuu ku muujinayaa ruqsaddiisa meel laga arki karo oo ka mid ah goobta shaqada.

### QODOBKA 46aad
### Kala-noqosho Ruqsad

1. Goluhu wuxuu kala noqonayaa shahaadada howl qabadka haddii haystaha;
   - b) Lagu helo xad gudub ku salaysan anshax xumo mihnadeed.
   - t) La xaqiijiyo in uusan maskax ahaan fayo qab ahayn.
   - j) Uu galo fal-dambiyeed maxkamadi xukuntay.
   - x) Ilaalin waayo ama ku xadgudbo anshaxa caafimaadka.
   - kh) Uu shahaadada howl-qabad uu ku helay si musuq ah, been abuur ah ama qarin xaqiiqada dhabta ah.
   - d) Uu galo xad-gudub ka dhan ah Xeerkan ama uu meel uga dhaco nidaamka anshaxa.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

2. Haddii diiwaan-gelinta mihnadlaha caafimaad lagala noqdo, shahaadada howl qabad ee uu haysto mihnadluhu waxay noqonaysaa waxba kama jiraan, waana in dib loogu celiyaa Golaha.
3. Goluhu wuxuu siinayaa mihnadlaha caafimaad fursad lagu dhegaysto ka hor inta uusan kala noqon shahaadada howl qabad ee mihnadlaha caafimaad sida uu tilmaamayo Qodobkani.
4. Goluhu wuxuu ka hakinayaa mihnadlaha caafimaad howsha muddada ay baarista ku socoto si waafaqsan Xeerkan iyo shuruudaha uu Goluhu go'aamiyo ka hor inta uusan kala noqon shahaadada howl qabad ee mihnadlahaas caafimaad.

## QODOBKA 47aad

### Codsi Oggolaansho Howl-gelin Xarun Caafimaad

1. Qofka doonaya in uu furto xarun caafimaad waa in uu ka codsadaa Golaha ruqsad ka hor inta aan la howlgelin xaruntaas.
2. Xarunta caafimaad ee la siiyay ruqsad, waxaa ruqsadeeda lagu muujinayaa meel muuqata oo ka mid ah xarunta caafimaadka.
3. Haddii mihnadlaha la siiyay ruqsadda xarunta uu go'aansado in uu joojiyo adeegga caafimaad ee xarunta wuxuu ruqsadda u soo celinayaa Golaha.
4. Golaha kaliya ayaa wax ka-beddeli kara ruqsadda haddii:

    b) Cid kale la wareegto xarunta caafimaad ee uu lahaa ruqsadle kale, isagoo ku bedelaya magaca cidda la wareegeysa; ama

    t) Magaca xarunta caafimaad isbeddelo, iyadoo magaca cusub lagu beddelayo kii hore.

## QODOBKA 48aad

### Mamnuucidda Howlgelinta Xarun Caafimaad Aan Heysan Ruqsad

1. Lama howlgelin karo xarun caafimaad iyada oo aan marka hore la siin ruqsad ay ku howl-gasho ee uu bixiyay Goluhu.
2. Haddii lagu helo xarun caafimaad in ay jebisay Faqradda (1) waxay gelaysaa xad gudub iyada oo mutaysanasya ganaax lacageed oo aan ka

badnayn labo kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin somaali u dhigma).

3. Fal-dembiyeedyada ay galaan howlwadeennada ka howl-gala xarun ku xad-gubtay faqradda 1aad ee qodobkan waxaa lagu ciqaabaya ciqaabta uu jediyeeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## QODOBKA 49aad
## Cusboonaysiin Ruqsad Xarun Caafimaad

1. Derejo kasta oo ruqsadda lagu bixiyey waa in la cusboonaysiiyaa halkii sanaba (1 sano) mar laga bilaabo taariikhda la bixiyay.
2. Goluhu wuxuu cubsoonaysiinaya ruqsadda xarunta caafimaad ee lagu bixiyay si waafaqsan Xeerkan haddii:

   b) Xaruntu ay si buuxda u dhaqan geliso nidaamka derejada lagu ruqsad siiyay.

   t) Xaruntu ay gudbiso macluumaad dhammeystiran uu Goluhu u baahanyahay oo shuruud u ah cusboonaysiinta ruqsadda; iyo

   j) Milkiilaha ama qofka mas'uulka ka ah xarunta caafimaad uu bixiyo khidmada cusbooneysiinta.

## QODOBKA 50aad
## Diidmo Bixin Ruqsad Xarun Caafimaad

1. Goluhu ma oggolaanayo codsi ruqsad bixin lagu howl geliyo xarun caafimaad haddii:
   b) Milkiilaha ama qofka mas'uulka ka ah xarunta caafimaad uu faraha kula jiro xad-gudub ka dhan ah qodobada Xeerkan;
   t) Mihnadlaha caafimaad ee ka mas'uulka ah xarunta uusan lahayn diiwaan-gelin isla markaana haysan ruqsad howl-gal oo shaqeyneysa;
   j) Xarunta caafimaad aysan buuxin dhismo ahaan, shaqaale ahaan, qalab ama qaab-dhismeedka hay'ad ee looga baahnaa ruqsad siinta;

   x) Mihnadlaha caafimaad ee mas'uulka ka ah xarunta caafimaad uusan haysan shahaado diiwaan-gelin ugu yaraan muddo gaaraysa saddex sanadood ka hor taariikhda codsiga.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

kh) Goluhu ku qanci waayo in mihnadlaha caafimaad uu si habboon uga diiwaan gashan yahay isla markaana leeyahay waayo aragnimo dal kale oo u dhiganta midda looga baahan yahay Soomaaliya.

2. Goluhu wuxuu si habboon ugu wargelinayaa codsadaha haddii la diido codsiga ruqsadda xarunta caafimaad sida ku tilmaaman Faqradda (1), isagoo u sheegaya sababaha diidmada.

## QODOBKA 51aad
## Baarista Rugaha/Xarumaha Caafimaad

1. Xarun kasta oo caafimaad waxaa la baarayaa ka hor inta aan la bixin ruqsadda iyo ugu yaraan lix bilood oo kasta.
2. Xarunta caafimaad waxaa baaraya khubarro aqoon iyo waayo aragnimo ballaaran leh oo uu Goluhu magacaabo.
3. Baareyaasha waxay muujinayaan caddeymahooda si loo aqoonsado xilliga ay ku howlan yihiin baaritaanka.
4. Baareyaasha waxay awood u leeyihiin in ay si habboon u galaan ama u baaraan goobaha loo adeegsado ama baareyaashu ku qancaan in loo adeegsado xarun caafimaad.
5. Baareyaasha waxay baari karaan ruqsadda howl-galka ee mihnadleyaasha ka howlgala xarunta caafimaad iyo diiwaanka lagu qoro warbixinta loo baahan yahay sida uu qabo Xeerkani.
6. Baareyaasha waxay baari karaan xarunta caafimaad iyo qalabka ay xaruntu adeegsato iyada oo laga fiirinayo in ay waafaqsan tahay nidaamka lagu ruqsad siiyay.
7. Mas'uulka ama cid ka tirsan xarunta caafimaad haddii uu:

   b) Dib u dhig ama is-hortaag ku sameeyo baare gudanaya howlihiisa baarista;

   t) Diida in uu si hufan gacan u siiyo baaraha si uu u guto waajibaadkiisa;

   j) Siiya baaraha macluumaad been ama marin habaabin ah.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

wuxuu gelayaa xad gudub uu ku mutaysanayo ganaax lacageed oo aan ka badnayn kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma) iyo ciqaabta uu u jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

8. Baareyaasha waxay u soo gudbinayaan Golaha warbixin qoraal ah oo la xiriirta natiijooyinka baarista.

**QODOBKA 52aad**

**Xiritaan Xarun Caafimaad**

1. Goluhu wuxuu awood u leeyahay in uu amro xiritaanka xarunta caafimaad haddii:
   b) Xarunta caafimaad ay ku xad gudubto shuruudaha ruqsadda lagu siiyay.
   t) Xarunta caafimaad aan lagu ruqsad siin si waafaqsan Xeerkan;
   j) Xarunta caafimaad ay ku caddaato in adeeg ay bixisay uu waxyeello ka soo gaartay bukaan taas oo ku timid tayo xumo, aqoon yari, ama dayacaad.
   x) Xarunta caafimaad ee jebisa qodobada Xeerkan ama sharci kale.
2. Goluhu wuxuu siinayaa xarunta caafimaadka wargelin qoraal ah oo ku aaddan xad-gudubka ay gashay marka uu helo warbixinta baaritaanka oo faahfaahinaysa in xarunta caafimaad aysan fulin shuruudaha ama ay bixiso adeegyo dhaafsan heerka ruqsadda la siiyay.
3. Rugta caafimaad marka ay hesho wargelinta ku tilmaaman Faqradda (2), waxay muddo todobo maalmood gudahood ah u soo gudbinaysaa xoghayaha guud qorshaheeda sixitaanka xad-gudubka oo faah-faahinaya jadwal taariikhaysan oo lagu dhammeystirayo sixitaanka xadgudubka ay gashay.
4. Rugta caafimaad, marka ay soo gudbiso qorshaha sixitaanka sida ku xusan Faqradda (3) uuna oggolaado Goluhu, waxay dhaqan gelinaysaa jadwalka uu ka kooban yahay qorshahaas.
5. Haddii Goluhu uu ku qanci waayo qorshaha sixitaanka xadgudubka, golahu wuxuu la noqonayaa ruqsadda goobta caafimaad, islamarkaana wuxuu amarayaa xiritaanka rugta.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ

6. Haddii Goluhu uu ku qanco in xadgudubka lagu helay xarunta caafimaadka uu khatar weyn ku yahay caafimaadka bulshada wuxuu isla markiiba xirayaa xarunta isaga oo kala noqonayaa ruqsadda.

## QODOBKA 53aad

### Ansixinta Xarun Waxbarasho Caafimaad

1. Haddii xarunta waxbarasho uusan ansixin Goluhu, kama bixin karto Soomaaliya waxbarasho caafimaad nooc kasta oo ay tahay, taas oo ujeedkeedu yahay in loo tabobaro qof ka howl-gelidda mihnad caafimaad ama uu qabto howl kale oo la xariirta baaris caafimaad, daaweyn, ama adeeg kale, daawoyaqaan, ama ka hortaga cudurada.
2. Xarun kasta oo doonaysa in ay bixiso waxbarasho ama tabobarid qeybo la xiriira caafimaadka waa in ay codsi u soo gudbisaq Golaha ka hor inta aysan billaabin waxbarashada ama tabobarka.
3. Codsiga ku salaysan Faqradda (2) waa in ay la socdaan-
   b) Faah-faahinta iyo caddeymaha la xiriira waxbarashadaas, ama barrnaamijyada tabobarada; iyo
   t) Bixinta khidmadda looga baahan yahay.
4. Ka dib tixgelinta codsiga, hubinta caddeymaha iyo faah-faahinta ku xusan Faqradda (3), Goluhu wuxuu qaadayaa tallaabada ku habboon:
   b) In uu bixiyo oggolaanshada;
   t) In uu diido ogolaanshada.
5. Marka Goluhu uu qaato go'aanka, xoghayaha guud waa in:
   b) Uu ku wargeliyaa xarunta waxbarashada caafimaadka si qoraal ah go'aan kasta oo lagu gaaray si waafaqsan Faqradda (4);
   t) Uu siiyaa shahaadada ansixinta xarunta waxbarashada caafimaadka ee codsigeedii la oggolaaday.
   j) Uu diiwaanka geliyo faah-faahinta oggolaanshada Golaha.
   x) Uu ku wargeliyo xarunta waxbarashada caafimaadka si qoraal ah, haddii oggolaanshada loo diiday iyo sababaha keenay diidmada.
6. Xaruntu waxay u dhaqan gelinaysaa ansixinta la bixiyay oo ay la socdaan shuruudaha lagu ansixiyay si hufan oo waafaqsan shuruuddii lagu bixiyay muddada xaruntaasi ay shaqaynayso.
7. Goluhu wuxuu magacaabi karaa baareyaal waqtiyo kala duwan si ay:

b) U baaraan in shuruudaha uu dejiyay Goluhu si waafaqsan Faqradda (5) ee xarumaha waxbarasho caafimaad si haboon loo fuliyey;

t) Warbixin u siiyaan Golaha natiijooyinka warbixinta baaritaanka iyo waxa lagu soo gunaanaday.

8. Goluhu wuxuu awood u leeyahay in uu ka laabtao oggolaasho uu hore u bixiyey si qoraal ah haddii ay u caddaato in xaruntaas waxbarasho ay ku guul darraysatay in ay dhaqan geliso shuruudaha ka dib marka xarunta waxbarasho la siiyo fursad lagu dhegaysto.
9. Xoghayaha guud waa in uu ku wargeliyaa si qoraal ah xarunta waxbarasho oo ay khusayso go'aan kasta ee Goluhu gaaray.
10. Xarunta waxbarasho ee ku tilmaaman Faqradda (8) waa in muddo soddon maalmood gudahood u soo celisaa Golaha shahaadada ansixinta laga bilaabo taariikhda wargelinta.
11. Xoghayaha guud waa in uu:

b) Baabi'iyaa shahaadada ansixinta ee hore loo siiyay xarunta waxbarashada caafimaadka, iyo

t) Geliyaa diiwaanka macluumaadka baabi'inta shahaadadaas.

12. Xarun kasta ee waxbarasho caafimaad oo mas'uuliyiinteeda ku guul darraystaan in ay dhaqan geliyaan si waafaqsan Faqradaha (1) iyo (6) waxay geleysaa xad gudub, haddii lagu helo, waxayna mutaysanaysaa ganaax lacageed oo aan ka badnayn saddex kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma) iyo joojinta bixinta adeegga waxbarashada caafimaadka.
13. Xeerkani kama hor istaagayo in lagu tabobaro xarumaha caafimaadka ardayda ujeedadoodu tahay in ay kororsadaan aqoontooda si ay u helaan shahaado diiwaan gelin haddii ay si toos ah u kormeerayaan mihnadleyaal leh aqoon sare oo diiwaan gashan lana ilaalinayo habraaca tabobarada uu Goluhu dejiyay.

## QODOBKA 54aad

### Ansixinta Barnaamij Waxbarasho Caafimaad

1. Xarunta waxbarasho ee fulinaysa tabobar mihnadeed caafimaad oo cusub waa in ay u soo gudbisaa Golaha codsiga ansixinta



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

barnaamijkeeda ka hor billowga tababarka. Dhammaan barnaamijyada tabobar ee hore u jiray waxaa ansixinaya Golaha.

2. Goluhu wuxuu go'aaminayaa ka dib marka uu si qoto dheer u baaro barnaamijka tababar ee la soo jeediyey in uu ansixiyo haddii uu buuxiyo dhammaan shuruudaha looga baahan yahay, ama uu diido haddii uu ku qanci waayo.
3. Goluhu ma oggolaanayo haddii xarun tababar sameyso tababar aan lagu ansixin si waafaqsan Xeerkan, shahaadooyinka tababarkaasi lagu qaato looma aqoonsanayo kuwo taabbo-gal.
4. Xarun waxbarasho caafimaad ma bixin karto tababar la xiriira caafimaadka oo loogu diyaarinayo arday mihnado caafimaad, haddii uusan Goluhu hore u ansixin barnaamijka tababarkaas.
5. Xarunta waxbarasho ee ku xad-gudbta Faqradda (4), howlwadeennadeedu waxay gelayaan xad-gudub ay ku mutaysanayaan ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma) iyo joojinta bixinta adeegga waxbarasho caafimaad.

## QODOBKA 55aad
## Qiimeynta Barnaamij Waxbarasho Caafimaad

1. Goluhu wuxuu qiimeynayaa barnaamijyada ay qabanayaan xarumaha lagu barto mihnadaha caafimaadka ee kala duwan iyada oo sharci ahaan laga eegayo arrimahaan soo socda:

   b) Muddada barnaamijka tababarka uu soconayo
   t) Shuruudaha uu Goluhu ku aqoonsanayo barnaamijkaasi tababar ee gaarka ah;
   j) Heerarka ugu yar ee lagu aqbali karo in barnaamijka tababarka uu soo saaro mihnadleyaal caafimaad oo loo diiwaan gelin karo mihnadle caafimaad ahaan
   x) Shuruudaha looga baahan yahay in uu buuxiyo barnaamijka tabobarka, kuwaas oo ay ka mid yihiin manhajka wax lagu barayo oo tayaysan, shahaadooyinka aqooneed ee howl-wadeennada kulliyadda, qalabka muhiimka u ah tayada barnaamijkaas waxbarasho iyo hannaanka shaqaalaynta howlwadeennada kulliyadda.

## QODOBKA 56aad
### Dib-u-eegista Barnaamijyada Waxbarasho Ee Hore Loo Ansixiyay

1. Goluhu wuxuu dib u eegayaa dhammaan barnaamijyada tababar ee hore loo ansixiyay sanad walba mar laga billaabo marka oggolaanshada kowaad la siiyay isaga oo si gaar ah tixgelin u siinaya heerka waxqabad ee howlwadeennada ka soo qalin jebiyay barnaamijyadaas tabobar.
2. Goluhu wuxuu ka noqon karaa oggolaanshada barnaamij tababar marka ay u caddaato in barnaamijka tabobar uusan hadda ka dib la jaan-qaadi karin shuuruudaha Xeerkan, ama barnaamijka tabobar uu si is-daba-joog ah u buuxin waayo ama ka hooseeyo heerarka looga baahan yahay barnaamijkaas.

## QODOBKA 57aad
### Ansixinta Adeeg Daryeel Caafimaad

1. Xarunta bixisa adeegyo caafimaad oo kala duwan ama soo kordhisa adeeg cusub waxay Golaha ka soo codsanaysaa in loo ansixiyo adeegyadaasi si waafaqsan xeerkan iyada oo bixinaysa khidmadda looga baahan yahay.
2. Ka dib helitaanka codsiga ku tilmaaman Faqradda (1), Goluhu wuxuuu u dirayaa baare xarunta caafimaad si loo soo hubiyo in xaruntaasi ay buuxisay shuruudihii ku xirnaa ansixin adeeggaas.
3. Golaha marka uu ku qanco in rugta caafimaad ay buuxisay shuruudaha ansixinta, wuxuu siinaysaa xaruntaas ansixin muddo hal sano ah.
4. Golaha wuxuu ku bixinayaa ansixinta adeegga daryeel shuruudaha u degsan oo khuseeya:
   b) Nooca adeegga caafimaad ee la bixinayo
   t) Aqoonta iyo khibradda mihnadlayaasha bixinaya adeegga
   j) Qalabka iyo mashiinada la adeegsanayo.
   x) Habraacyada daweynta ama qalliinka.
   kh) Heerka ruqsada xarunta caafimaad.
   d) tabobaridda mihnadlayaasha ka qeyb qaadanaya bixinta adeeggaas.

5. Goluhu ma siinayo xarunta caafimaad ansixin haddii adeegga caafimaad uu xumaan iyo liidnimo u keenayo bukaanka iyo hannaanka daryeelka caafimaadka.
6. Goluhu haddii uu diido codsiga ansixinta wuxuu si qoraal ah ku wargelinayaa xarunta caafimaad isaga oo qeexaya sababaha diidmada.
7. Adeegga caafimaad ee ku cusub Soomaaliya marka uu soo buuxiyo shuruudaha faqrada (4), Goluhu wuxuu siinayaa ansixin ku meel gaar ah oo muddadiisu tahay seddex bilood.
5. Golaha wuxuu baaritaan iyo qiimeyn qorsheysan ku sameynayaan hanaanka iyo natiijada adeegga cusub ee caafimaad isaga oo u xil saaraya khubarro uu soo magacaabay Goluhu waxayna baarayaan:
   b) Uruurinta xogta la xiriirta adeeggaas.
   t) Natiijada/faa'iidada uu ka helayo bukaanka marka uu helo adeeggaas.
6. Golaha wuxuu go'aan ka gaarayaa warbixinta faah-faahsan oo ay soo gudbiyaan khubarada isagoo go'aaminaya in:
   b) Uu sii socdo bixinta adeegga caafimaad ee cusub.
   t) La joojiyo adeegga caafimaad ee cusub.
7. Goluhu haddii uu bixinayo ansixin adeeg caafimaad wuxuu ku meel marinayaa heerka ruqsadda ee xarunta caafimaad ay mudan tahay.

## QODOBKA 58aad

### Cusbooneysiin Ansixin

1. Ansixinta la siiyey adeeg daryeel walba oo ay bixiyaan xarumaha caafimaad waxaa si joogto ah loo cusboonaysiinayaa labo iyo tobankii (12) biloodba mar.
2. Goluhu wuxuu weydiisan karaa warbixin faahfaahsan iyo xog la xariirta adeegga caafimaad ka hor cusbooneysiinta ansixinta.
3. Goluhu wuxuu dalbanayaa in baaritaanno lagu sameeyo adeegyada caafimaadka oo dhan si loo hubiyo in si joogto ah loo dhaqan-geliyay shuruudihii loo baahnaa.
4. Haddii adeegga caafimaad uu soo buuxin waayo shuruudaha cusbooneysiinta ama aan laga helin xarunta caafimaad warbixin iyo xog



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

faah-faahsan, Goluhu waxaa uu joojinayaa cusbooneysiinta ansixinta adeegaas.

## QODOBKA 59aad
### Kala -noqosho Ansixin

1. Marka xarunta caafimaad ay ku xad-gudubto shuruudaha lagu bixiyay ansixinta, Goluhu wuxuu kala noqonayaa ansixinta si qoraal ahna ugu wargelinayaa cidda ay khuseyso.
2. Inta kala-noqoshadu dhaqan-galka tahay looma oggola xaruntaas in ay bixiso adeeg caafimaad iyada oo aan dib u helin ansixin kale.

## QODOBKA 60aad
### Shahaadooyinka Waxbarasho ee Shisheeye

1. Goluhu wuxuu tixgelinayaa shahaadooyinka mihnadlayaasha caafimaad ee shisheeye haddii:
   b) Lagu bixiyay af-Ingiriisi ama Af-Carabi
   t) Ay ka wadato tas-diiqin iyo shaabad Wasaaradaha Tacliinta Sare iyo Arrimaha Dibedda ee Dalka lagu bixiyey shahaadada.
   j) Ay ka wadato tas-diiqin iyo shaabadayn Safaaradda Soomaaliya u fadhida Dalka shahaadada lagu bixiyey.
   x) Tas-diiqin ay bixisay Wasaaradda Hidaha iyo Tacliinta Sare ee Soomaaliya ay ku sugayso in shahaadada tahay mid meel mar ah.
2. Haddii ay dhacdo in shahaadada lagu bixiyey luqado kale oo aan ahayn Ingiriis iyo Carabi, waa in lagu turjumaa luqadaha Soomaaliga, Carabiga ama Ingiriisiga isla markaasna la waafajiyaa shuruudaha ku tilmaaman Faqradda (1).

## QODOBKA 61aad
### Aqoonsiga Ururada Mihnadlayaasha Caafimaadka

Xeerkani wuxuu aqoonsanayaa dhammaan ururada mihnadleyaasha caafimaadka ee kala duwan oo ay leeyihiin mihnadyaal caafimaad oo la aqoonsan yahay haddii ay buuxiyaan shuruudaha soo socda:



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ

1. Xubnaha Ururka aysan ka yarayn toban iyo kow (11) xubnood;
2. In ururku leeyahay dastuur shaqaynaya oo qeexaya xuquuqda iyo xilalka xubnaha, sida oo kalena muujinaya himillooyinkiisa, qaab-dhismeedka ururka iyo xeerar lagu nidaaminayo anshaxa mihnadlayaasha xubnaha ururka.
3. In nuqulka dastuurka loo soo gudbiyo Golaha.
4. In shahaadooyinka xubnaha ururka ay si toos ah ula xiriiraan mihnadda ururka caafimaadka ee ay ka tirsan yihiin.

## QODOBKA 62aad
## Xayeysiin

1. Qofna ma xayeysiin karo adeeg caafimaad:
   b) Haddii uu yahay mid ku saleysan been, dhagar ama marin habaabin;
   t) Bixiya hadiyado, qiimo dhimis ama ka dhaadhicin lagu soo jiidanayo qof si uu u isticmaalo adeegga caafimaad, haddii xayeysiintu aysan qeexin qodobbada iyo shuruudaha adeeggaas.
   j) Adeegsada caddeymo looga gol-leeyahay marin habaabin ku aadan ka ganacsiga adeegga caafimaadka.
   x) Abuuraya rajooyin dhalanteed ah oo la xariira dhiirrigelin adeeg ama daaweyn aan waxtar lahayn.
   kh) Toos ama si dadban u dhiirrigelinaya kala saarid la'aanta baaritaanka, daweynta, iyo takhasusyada mihnadda caafimaadka.
2. Haddii lagu xad-gudbo habraacyada xayeysiinta isla markaana lagu helo xad-gudubkaas, waxaa qofka ama xarunta caafimad ay mutaysanaysaa ganaax:
   b) Haddii uu shakhsi yahay kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin somaali u dhigma)
   t) Haddii ay tahay xarun caafimaad labo kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma).
3. Xad-gudub ku xusan Faqradda (1aad) laguma qaadayo qofka ama xarunta uu ganacsigiisa/ganacsigeeda qeyb ka yahay daabicidda ama faafinta xayeysiin ay hay'ad ama qof kale leeyahay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
مجلس الشيوخ

## QODOBKA 63aad
### Ilaalinta Hor Gale Magac

1. Sida uu qabo Xeerkani, cidna ma adeegsan karto hor gale magac uusan sharcigu u oggolaanin sida "Dhakhtar", iyada oo dhammaystiran ama la soo gaabiyay, ama wax u dhigma ee luqad kale, ama eray kasta oo leh qeexid guud oo ku tusinaya daryeel caafimaad oo la siiyo shakhsiyaad ku sugan Soomaaliya.
2. Qof aan ahayn dhakhtar caafimaad ama mid ilko, waa in uusan:
   b) U howl gelin sidii dhakhtar caafimaad ama mid ilko, sida oo kalena, aan loo shaqaaleysiin adeeg bixiye daryeel caafimaad.
   t) Uusan qaban howlo caafimaad oo dadku u qaadan karaan in qofkaasi yahay takhtar caafimaad  ama mid ilko.
3. Qof aan ahayn mihnadle caafimaad oo diiwaan-gashan oo looma oggola in uu si ogaal ama xilkasnimo xumo ah:
   b) U qaato ama adeegsado mansab ah "mihnadle caafimaad oo diiwaan gashan"
   t) U qaato ama u adeegsado mansab, magac, magac-horaad, astaan, eray, calaamad, ama qeexid muujinaysa in uu si sharci ah uga howlgalo mihnad caafimaad.
4. Qofka ku xadgudba Faqraddaha (1), (2) iyo (3) wuxuu gelayaa xad-gudub uu ku mutaysanayo, marka lagu helo, ganaax lacageed oo aan ka badnayn labo kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma) ama ciqaabta uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.
5. Qof ama rug caafimaad ma howl gelin karaan qof aan lagu diiwaan gelin mihnadle caafimaad. Haddii ay jebiyaan faritaankan waxay mutaysanayaan ganaaxyo gaaraya ugu badnaan:
   b) Haddii uu yahay shakhsi kun iyo shan boqol oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma)
   t) Haddii ay tahay xarun labo kun iyo shan boqol oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma)
6. Mihnadle caafimaad oo diiwaan gashan looma oggola in magaciisa uu ku howl galo ama xaruntiisa uu ka howl geliyo qof kale oo aan ahayn mihnadle caafimaad oo diiwaan gashan. Ciddii ku xad gudubta faqraddan waxay mutaysanaysaa ganaax lacageed aan ka badnayn kun



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

oo Doollarka Maraykanka ah (ama shillin Soomali u dhigma) ama ciqaabta uu jideeyay Xeerka Ciqaabta Soomaaliyeed.

## QODOBKA 64aad
### Xakamaynta Adeegsiga Mansabyada Takhasusle

1. Qof aan ahayn howlwaadeen caafimaad oo takhsusle ah looma oggola in uu si oggaal ama xilkasnimo-xumo ah:
   b) U qaato ama u adeegsado mansabka "mihnadle caafimaad takhasusle";

   t) U qaato ama u adeegsado mansab, magac, magac-horaad, astaan, eray ama qeexid muujinaysa xaalado in la adeegsanayo ama si cad looga fahmayo: in uu yahay mihnadle caafimaad takhasusle ah ama in awood loo siiyey ama u qalmo in uu ka howl-galo takhasus gaar ah.
2. Ciddii ku xad-gudbta qodobkan waxay mutaysanaysaa ganaaxyada soo socda:
   b) Haddii uu shakhsi yahay kun iyo shan boqol oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhigma)
   t) Haddii ay xarun tahay seddex kun oo Doollarka Maraykanka ah (ama shilin Soomaali u dhiganta).

## QODOBKA 65aad
### Xeer-hoosaadyo iyo Xeer nidaamiyeyaal

Goluhu wuxuu soo saari karaa xeer hoosaadyo ama xeer nidaamiyeyaal ku saabsan arrimaha uu xeeriyay Xeerkan waxaana xeer hoosaadyadani lagu dhaqayaa meelaha soo socda:

1. Mihnadlayaasha caafimaad ee leh diiwaan gelin iyo ruqsad.
2. Rugaha adeegyada caafimaad.
3. Xarumaha waxbarashada caafimaad.
4. Cilmi barista caafimaadka ee Dalka.
5. Ururada mihnadaha caafimaad ee la aqoonsan yahay.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

## QODOBKA 66aad
## Kala Dirista Golaha

1. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya (Golaha Wasiirada) waxay kala diri kartaa Golaha (GMCQ) haddii uu ku guul-darraysto gudashada awoodaha loo igmaday si waafaqsan Xeerkan ama shuruucda kale.
2. Ka dib marka la kala diro Golaha si waafaqsan Faqradda (1), Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay la wareegaysaa xisaabta iyo hantida kale ee Golaha, sida oo kale, waxayna hirgelin kartaa dhammaan awoodaha iyo howlaha ku xusan xeerka u degsanaa golaha la kala diray.
3. Xukuumadda Federaalka Soomaaliya waxay magacaabaysaa guddi ku meel gaar ah oo ka howl-gala fulinta awoodaha iyo howlaha ku xusan xeerka GMCQ.
4. Xukuumaddu waxay ku dhisaysaa gole cusub muddo seddex bilood gudahood ah marka la kala diro Golaha.
5. Xukuumaddu waxay ku wareejinaysaa golaha cusub xisaabta iyo hantida la gala wareegay golihii la kala diray si waafaqsan Faqradda (2).

## Qodobka 67aad
## Xarunta Rasmiga ee GMCQ iyo Baaxadda Awoodaha Golaha

1. Xarunta rasmiga ah ee GMCQ waa magaala madaxda Dalka ee Muqdisho.
2. Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka wuxuu xafiisyo ku yeelan karaa Dowlad Goboleedyada xubinta ka ah Dowladda Federaalka.
3. Goluhu wuxuu ku metelaa mihnadleyaasha caafimaadka fagaareyaasha caalamiga ah iyo kuwa urur goboledyada adduunka.



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE
AQALKA SARE

## QODOBKA 68aad
### Wax Ka Bedelidda Xeerka

1. Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka iyaga oo u maraya Wasaaradda Caafimaadka waxay Baarlamaanka Federaalka u soo jeedin karaan wax-ka-beddel lagu sameeyo xeerkan.
2. Baarlmaanka Federaalka isaga oo tixgelinaya talo soo jeedinta Wasaaradda ama si iskiis ah ayuu wax uga beddelayaa Xeerkan.

## QODOBKA 69aad
### Racfaan

1. Qofkii ku qanci waaya go'aan ama amar uu soo saaray Golaha GMCQ ee ku salaysan Xeerkan wuxuu racfaan u qaadan karaa Maxkamadda Sare muddo ku siman soddon maalmood, laga billaabo taariikhda uu soo baxay go'aankaas ama amarkaas.

## QODOBKA 70aad
### Warbixin sanadeed

1. Dhammaadka sanad kasta, gaar ahaan 3da bilood ee ugu dambeeya sanadka (Oktoobar, Nofeembar, ama Diseembar), Guddoomiyaha Golaha waa in uu u gudbiyaa warbixin sannadeedka Golaha Wasaaradda Caafimaadka (WC) iyo Guddiyada Arrimaha Bulshadda ee Barlamaanka Federaalka Soomaaliya.

## QODOBKA 71aad
### Baab'in

1. Xeerkani wuxuu baab'inayaa sharci kasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon karin.

## QODOBKA 72aad
### Muddada Kala Guurka

1. Lix bilood ka dib marka uu dhaqan galo Xeerkani, looma oggola cid aan diiwaan gashanayn ama aan haysan ruqsad howlgal ee mihnad caafimaad ama xarun adeeg caafimaad ama waxbarasho in ay ka howl galaan si toos ah ama si dadban Dalka Soomaaliya.

## QODOBKA 73aad
### Dhaqan-galka Xeerkan

1. Xeerkan wuxuu dhaqan-gal noqonayaa marka uu Baarlamaanka Federaalku ansixiyo, saxiixo Madaxweynaha JFS, laguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee JFS.
2. Wasaaraadda Caafimaadka ayaa u xilsaaran hirgelinta Xeerkan iyada oo aan lagu xadgudbin madax-bannaanida Golaha.

# Tusmo


QODOBKA 1aad ........ 1

Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka (GMCQ) ........ 1

Qodobka 2aad ........ 2

Erey Bixin ........ 2

QODOBKA 3aad ........ 5

Dhismaha Golaha Mihnadleyaasha Caafimaadka Qaranka ........ 5

QODOBKA 4aad ........ 6

Magacaabidda Xubnaha Golaha ........ 6

QODOBKA 5aad ........ 7

Shuruudaha Guud ee Xubinnimada Golaha ........ 7

QODOBKA 6aad ........ 7

Heerarka iyo Xuquuqda Xubinnimada ........ 7

Qodobka 7aad ........ 8

Xubnaha Rasmiga ah ........ 8

Qodobka 8aad ........ 8

Aragti-wadaag (Partners) ........ 8

Qodobka 9aad ........ 9

Xiriir - wadaag (Associates) ........ 9

QODOBKA 10aad ........ 9

Awoodaha iyo Xilalka Golaha ........ 9

QODOBKA 11aad ........ 10

Waayista Xubinnimada Golaha ........ 10

QODOBKA 12aad ........ 10

Dhammaadka Xubinnimada Golaha ........ 10

QODOBKA 13aad ........ 11

Shaqaalaha Golaha ... 11

QODOBKA 14aad ... 11

Awoodaha iyo Xilalka Xoghaynta Guud ... 11

QODOBKA 15aad ... 11

Kulamada Xoghaynta Guud ... 11

QODOBKA 16aad ... 12

Kulamada iyo Go'aannada Golaha ... 12

QODOBKA 17aad ... 13

Guddiyo Gaar Ah ... 13

QODOBKA 18aad ... 13

Cilmi-baarista Caafimaadka ... 13

QODOBKA 19aad ... 14

Abuurista Maktabadda Asaasiga ah ee Golaha ... 14

QODOBKA 20aad ... 14

Dhaqaalaha Golaha iyo Ilaha Laga Helayo ... 14

QODOBKA 21aad ... 15

Isticmaalka Dhaqaalaha Golaha ... 15

QODOBKA 22aad ... 15

Xiriirka Iskaashi ee Golaha ... 15

QODOBKA 23aad ... 16

Khidmado ... 16

QODOBKA 24aad ... 16

Diiwaan-gelinta, Ruqsad-siin iyo Ansixinta ... 16

QODOBKA 25aad ... 17

Codsi Diiwaan-gelin ... 17




JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE ... HOUSE

QODOBKA 26aad ..... 17

Shuruudaha Diiwaan-gelinta ee Mihnadlayaasha Caafimaad ..... 17

QODOBKA 27aad ..... 18

Heerarka Diiwaan gelinta ..... 18

QODOBKA 28aad ..... 18

Diiwaan gelin Ku meelgaar ah ..... 18

QODOBKA 29aad ..... 19

Diiwaan-gelin Buuxdo ..... 19

QODOBKA 30aad ..... 19

Diiwaan gelin Takhasusle ..... 19

QODOBKA 31aad ..... 20

Beddelaadda Macluumaad ..... 20

QODOBKA 32aad ..... 20

Kala Noqoshada Diiwaan-gelinta ..... 20

QODOBKA 33aad ..... 21

Ka noqoshada Diiwaan-gelin Shahaado ..... 21

QODOBKA 34aad ..... 21

Dib-u-diiwaan gelin ..... 21

QODOBKA 35aad ..... 22

Nuqul Sameyn Shahaado Diiwaan gelin ..... 22

QODOBKA 36aad ..... 23

Shuruudaha Diiwaangelinta Mihnadleyaasha Caafimaadka ..... 23

ee Shisheeye ..... 23

Qodobka 37aad ..... 23

Diiwaan gelin Ku Meel Gaar ah ee Minadleyaasha Shisheeye ..... 23




JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA

Qodobka 38aad ........ 24
Diiwaan gelin Xaddidan ........ 24
QODOBKA 39aad ........ 25
Mamnuucidda Howl-galka ........ 25
Mihnadleyaasha aan Diiwaan-gashanayn ........ 25
QODOBKA 40aad ........ 25
Xadgudubyada Ka Yimaada Mihnadle Caafimaad ........ 25
QODOBKA 41aad ........ 26
Diiwaan gelinta Xarun Caafimaad ........ 26
QODOBKA 42aad ........ 27
QODOBKA 43aad ........ 28
Mamnuucidda Howlqabadka ........ 28
Mihnadlaha Aan Ruqsadda Heysan ........ 28
QODOBKA 44aad ........ 28
Cusboonaysiin Ruqsad Howl-qabad ........ 28
QODOBKA 45aad ........ 29
Muujin Ruqsadeed ........ 29
QODOBKA 46aad ........ 29
Kala-noqosho Ruqsad ........ 29
QODOBKA 47aad ........ 30
Codsi Oggolaansho Howl-gelin Xarun Caafimaad ........ 30
QODOBKA 48aad ........ 30
Mamnuucidda Howlgelinta ........ 30
Xarun Caafimaad Aan Heysan Ruqsad ........ 30
QODOBKA 49aad ........ 31



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Cusboonaysiin Ruqsad Xarun Caafimaad ........ 31
QODOBKA 50aad ........ 31
Diidmo Bixin Ruqsad Xarun Caafimaad ........ 31
QODOBKA 51aad ........ 32
Baarista Rugaha/Xarumaha Caafimaad ........ 32
QODOBKA 52aad ........ 33
Xiritaan Xarun Caafimaad ........ 33
QODOBKA 53aad ........ 34
Ansixinta Xarun Waxbarasho Caafimaad ........ 34
QODOBKA 54aad ........ 35
Ansixinta Barnaamij Waxbarasho Caafimaad ........ 35
QODOBKA 55aad ........ 36
Qiimeynta Barnaamij Waxbarasho Caafimaad ........ 36
QODOBKA 56aad ........ 37
Dib-u-eegista Barnaamijyada ........ 37
Waxbarasho Ee Hore Loo Ansixiyay ........ 37
QODOBKA 57aad ........ 37
Ansixinta Adeeg Daryeel Caafimaad ........ 37
QODOBKA 58aad ........ 38
Cusbooneysiin Ansixin ........ 38
QODOBKA 59aad ........ 39
Kala -noqosho Ansixin ........ 39
QODOBKA 60aad ........ 39
Shahaadooyinka Waxbarasho ee Shisheeye ........ 39
QODOBKA 61aad ........ 39



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE

Aqoonsiga Ururada Mihnadlayaasha Caafimaadka ........ 39

QODOBKA 62aad ........ 40

Xayeysiin ........ 40

QODOBKA 63aad ........ 41

Ilaalinta Hor Gale Magac ........ 41

QODOBKA 64aad ........ 42

Xakamaynta Adeegsiga Mansabyada Takhasusle ........ 42

QODOBKA 65aad ........ 42

Xeer-hoosaadyo iyo Xeer nidaamiyeyaal ........ 42

QODOBKA 66aad ........ 43

Kala Dirista Golaha ........ 43

Qodobka 67aad ........ 43

Xarunta Rasmiga ee GMCQ iyo Baaxadda Awoodaha Golaha ........ 43

QODOBKA 68aad ........ 44

Wax Ka Bedelidda Xeerka ........ 44

QODOBKA 69aad ........ 44

Racfaan ........ 44

QODOBKA 70aad ........ 44

Warbixin sanadeed ........ 44

QODOBKA 71aad ........ 44

Baab'in ........ 44

QODOBKA 72aad ........ 45

Muddada Kala Guurka ........ 45

QODOBKA 73aad ........ 45

Dhaqan-galka Xeerkan ........ 45



JAMHUURIYADDA FEDERAALKA SOOMAALIYA
جمهورية الصومال الفيدرالية
FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
THE UPPER HOUSE